# TOOSI UBADKA



# TOOSI UBADKA

## « Kaalaha Baraha iyo Waalidka »

PJ
2534
.Y85
T66
1981

Qore : Yusuf Moxamed Xayd

XUQUUQDA QORUHU WAA DHAWRSAN TAHAY

RSCH
H/E5627

WAXAA LAGU DAABACAY MADBACADDA QARANKA

1981

BUUGGANI WUXUU XASUUS U YAHAY
ADEERKAY XAAJI FAARAX XAYD

# HORDHAC

Baruhu hawsha uu gudanayo si ay u noqoto mid meel mar ah oo guul laga gaadho, waxa looga baahan yahay inuu aqoon u leeyahay waxa uu dhigaayo, cidda uu u dhigayo iyo sidii uu u dhigi lahaa.

Haddaba si uu u abuurmo jawi ku habboon waxbarashada ardayga, waxa lama huraan ah in agaasinka fasalku noqdo, baruhu mid ka adag xaaladaha kala duduwan ee markastaba soo foodsaara. Marka baraha la carbinaayo amaba la tababarayo waxa lagu kiilaa aragtiyo hababka ama dariiqooyinka wax loo dhigo, laga yaabeese in marka fasalka uu soo galo, arrintuba kadis ku noqoto oo baraha jahwareer ku dhaco, taasina keento agaasinkii fasalka oo fashilma, cawaaqibkeeduna noqdo baraha oo ku guuleysan waaya farriintii uu gudbinayey. Waxaanay taasi ka dhalan kartaa ku adeegis la'aanta iyo u beddelid la'aanta qaab wax qabad aragtiyooyinkii dariiqooyinka wax loo dhigo. Runtii lama odhan karo waa inuu baruhu isticmaalo dariiqooyinka noocaas ah marka xaalado gaar ahi ka abuurmaan fasalkiisa, hase ahaatee waxa ay markasta ku xidhan tahay sida uu u abbaaro tabta iyo xeeladaha uu isticmaalayo, kol haddii uu ku hubeysan yahay dariiqooyinkii.

Haddaba buuggan, oo ah kii u horreeyey ee noociisa ah, laguna qoro Af Soomaali waxa qoruhu, Jaalle Xayd, si cilmi ah ku soo bandhigay arrimo kaalmeynaya waalidka iyo barahaba. Buuggu wuxuu daaha ka rogey jawaabo badan oo baraha iyo waalidkaba su'aalahoodu hortaagnaayeen.

Wuxuu ku hubeynayaa tabaha iyo xeeladaha ay ku guda geli lahaayeen amaba ku abbaari lahaayeen xaaladaha hawl maalmeedka iyo mashaakilka cilmi nafsiga kaga soo fool yeesha. Waxa uu fidinayaa fikrado iyo xalilaad baraatiko ah.

Buuggu waxa uu qayb lixaad leh ka qaadan karaa carbinta macallimiinta, isagoo la sii socodsiinaya mashaakilka ka dhici kara fasalka gudihiisa, taas oo fursad u siinaysa sidii ay ugu dabbiqi lahaayeen tiyooriyada ay markaas dhiganayaan. Waxa ka shidaal-qaadan kara oo markasta kaalmo lagama maarmaana u yahay macallinka goobta shaqada jooga. Waxa uu wehel u yahay macallinka hawshiisa gudanaya ee mashaakilka xaqiiqada ahi hor imanayaan, kol haddii ay dad yihiin waxa uu barbaarinayo.

Buuggu wuxuu ka kooban yahay toddoba qaybood oo kala ah :

1. Macallinka Toosan.
2. Macallinka Qalloocan.
3. Xidhiidhka Wadareed.
4. Halaagga Ammaanta.
5. Toosinta Asluubta Ardayga.
6. Waalidka iyo Dugsiga.
7. Kicinta Dareenka Ardayga Waxbarashada ku liita.

Qaybahaasi guud ahaan waxay ku saleysan yihiin hab wax qabad, waxaanay gargaar joogto ah u yihiin macallimiinta iyo waalidiintaba.

Markaasi waxa lagu raja weyn yahay macallimiinta iyo waalidiintuba inay buuggan kaalmeysan doonaan si barbaarinta ardaydu u noqoto mid la hanto.

**Saciid Maxamuud Cali**
**Kor. Guud ee Machadka Tababarka**
**Macallimiinta ee Xalane.**

# TUSMO


HORDHAC

MACALLINKA TOOSAN 1—8

MACALLINKA QALLOOCAN 9—18

XIDHIIDHKA WADAREED 19—41

HALAAGGA AMMAANTA 42—49

TOOSINTA ASLUUBTA ARDAYGA 50—68

WAALIDKA IYO DUGSIGA 69—82

KICINTA DAREENKA ARDAYGA WAXBARASHADA KU LIITA 83—100

## QAYBTA KOWAAD

# *MACALLINKA TOOSAN*

## AFKAARTA IYO WAX QABADKA

Waxaa la yiri beri nin Filosoofar ah baa dooni bad ku maraayey. Doonida waxa kula jiray nin badmareen ah (naakhuude) oo doonida waday oo keliya. Ninkii Filosoofarka ahaa baa ninkii doonida waday ku jeestoo yiri. «Falsafadda ma taqaan ? »

Ninkii doonida waday baa ugu jawaabay. «Waan aqaan ma odhan karo».

Filosoofarkii baa madaxa ruxay oo yiri, «Noloshaadii, saddex meelood meel baad weyday. Suugaanta, iyada wax ma ka taqaan ?»

Badmareenkii baa mar labaad ku jawaabay, «Waan aqaan ma odhan karo».

Filosoofarkii baa kor u booday isaga oo murugeysan oo ku gurxamay, «Noloshaadii laba meelood meel baad weyday». Hadalkaasi markuu afkiisa ka soo dhammaaday bey doontii foodda dhagax ku dhufatay oo laba meelood intay u kala jabtay degtay. Arrinkii wuxuu noqday qof walowba dabaal naftaada kula baxso. Bad-mareenkii oo sii dabaalanaya baa filosoofarkii ku soo jeestoo yiri. «Dabaasha ma taqaan ?»

Filosoofarkii oo aad u naxsan oo anfariirsan baa erayo jajaban ku yiri. «Maya ! !»

Badmareenkii oo sii dabaalanaya baa ku soo tuuray. «Noloshaadii oo dhan baad weyday».

Marka dhibaato abuuranto afkaar madaxa ku jirtaa wax tari mayso. Ninka ku jira dooni degaysa waa inuu dabaasha yaqaan ama naftiisa waaya. Sidaas oo kale marka fasal dhibaato ka dhacdo buugaagta adduunka

taalla oo dhammi wax kama qaban karaan. Waxaa wax ka qaban kara oo qudha xeesha iyo xirfadda macallinka markaa ku jira oo qudha.

## U CAQL*I* CEL*I*NTA ARDAYGA

Macallimad baa soo qaadday buugaagtii fasalka 3aad ee af Soomaaliga oo fasal la soo gashay oo ardaydii u qaybisay. Ibraahim oo aan buug helin baa buugaagtii dhammaatay. Ibraahim oohin buu la fariistay isaga oo leh, «maalin walba anigaa ugu dambeeya. Magacaygu «I» buu ka bilowdaa oo mar walba «eber» baa lay siiyaa. Magacayga ma doonayo, adiga kuma doonayo, dugsiga ma doonayo, fasalka waa necbahay, wax walba ma doonaayo oo waa necbahay».

Macallimaddii markiiba waxay garatay in Ibraahim caqli celin u baahan yahay. Waxay u qortay warqad yar. Warqaddiina waa tan :

Ardaygaygii Ibraahinow,

Waa garanayaa inaad ka xumaatay sida wax u dhaceen. Waxaad sugaysay in buugaagtii cusbaa lagu siiyo, markaas baad weyday. Adiga mooyee ardaydii kale oo dhammi buugaagtoodii wey heleen. Buugaagtii cusbayd inaad hesho oo si dhaqso ah u hesho aniga iga sug.

Macallimaddii ku jeclayd, Aamina.

Ibraahim ma filayn in macallimaddiisu warqad u soo qorto. Wuu yaabay oo aad u farxay. Waxay ku noqotay fajaciso uusan muddo dheer ilaawi karin.

Waxaa laga yaabaa haddii ay macallimaddu dariiq kale qaadi lahayd oo odhan lahayd, «Maxaad isla waalaysaa ! ? Maanta buuggii haddaan lagu siin berri baad helaysaaye ! Adiga oo sagaal jir ah baad sidii carruurta

u ooyaysaa!». In Ibraahim ka sii dari lahaa oo dugsigaba ka carari lahaa.

## TIXGELINTA RABIDDA ARDAYGA

Macallin baa ardayad u diray inay wax ka soo qorto gabayadii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan. Ardayadii baa tiri, «Macallin, gabayadu waa igu adag yihiine wax kale ii dir.

Macallinkii oo markiiba gartay dhibaatada ardayada, baa yiri, «Waa ogahay in gabayadu kugu adag yihiine, wax adag haddaanad isku dayin sidee baad u baran? Waxaad yeeli, waxaad garan waydo ila socodsii anigaa ku caawine». Ardayadii macallinku sida fiican ee uu ula hadlay iyada oo ku faraxsan bey u mahad naqday oo ka tagtay.

## DEDIDDA DAREENKA

Marka macallinku arko arday ku kacay wuxuusan jeclaysan, inuu dareenkiisa dedaa waa waajib. Arday la yiraahdo Suleymaan baa laga soo beddelay dugsi magaalo degmo ah ku yaal. Wuxuu yimi dugsi magaalo madaxda ku yaal, waxaana la geeyey fasal.

Macallinkii baa farta ugu fiiqay kursiguu fadhiisan lahaa. Suleymaan markuu is yiri fadhiiso buu miiskii macallinka jiidhay oo buugaagtii ka daadiyay. Suleymaan markuu arkay waxa dhacay iyo ardaydii oo qoslaysa buu naxdin la qalalay.

Macallin : Suleymaan, dhibaato ma jirtee buugaagta ila ururi.

Suleymaan: Macallin, maalintii iigu horreysayba mashaqaan ku geshay !

Macallin : Wax aad ula kac u yeeshay ma jiraan.

Macallinkii, Suleymaan buu buugaagtii la ururiyey. Arrinkan fasalka ka dhacay macallinku asluub toosan buu ku muujay. Wax canaan ah ama laga weji gabxo meesha ma keenin. Wuxuu tilmaamay wixii in la qabto loo baahnaa oo ah in la ururiyo buugaagtii daadatay. Suleymaan waxaa ku dhalatay qaddarin iyo ixtiraam uu macallinkaas u hayn doono.

## MACALLINKU WAA INUU QOF BISIL AHAADAA

Macallin baa fasal soo galay. Wuxuu arkay wejigiisii oo aad iyo aad u fool xun oo lagu taswiiray sabuuradda. Wuxuu kaloo arkay ardaydii oo aamusan oo sugaysa wuxuu yeeli doono.

Macallinkii si niyad ah buu muddo taswiirtii u daawaday. Isaga oo qoslaaya buu arday ku soo jeestay oo yiri, «Qofkii taswiiray hambalyo baan u soo jeedinayaa. Waxaan ka xumahay isaga oo ku taswiiray meel uu ka baaba'ayo. Ha ku dadaalo taswiirta. Imminkana hadduu ka gaarsiin karo ha ku naqilo waraaq».

Macallinkani wuxuu muujiyay bisayl. Wax aargoosi ah haba yaraatee ma muujin. Qofkii wax taswiiray inuu helo iskuma dayin. Meeshii ay ciqaab ka filayeen wuxuu ula' kacay qiimeynta farshaxanka iyo jaceylka uu u hayo.

## WIIL - WAAL

Macallin baa dugsi loo beddelay. Fasalkii ugu horreeyey markuu galay buu arday kiciyay oo magaciisa weydiiyay. Ardaygii baa ugu jawaabay, «Wiil-Waal», ardaydiina qosol bey dhegaha ku dillaaciyeen.

Macallinkii baa yiri, «Wiil-Waal, wuxuu ahaa geesi Soomaaliyeed oo taariikh dheer leh. Marka qofkii ma-

gaciisa la baxa ama jeclaysta sharaf bey u tahay ee fariiso». Fasalkii baa mar qura aamusay oo indho taagani ka soo hareen, macallinkiina darsi bixin buu bilaabey.

Macallinkan waxaa badbaadiyay xirfad, tab iyo xeel dheeri. Waxaa laga yaabaa in macallimiinta qaarkeed arrinkan ka kicin lahaayeen rabsho iyo qas aad u culus.

## DULQAADKU WAA ASTAAN MACALLIN

Ardayad 5 jir ah oo ku jirta xannaanada carruurta baa macallimadeedii u timi oo ay sheekada soo socotaa dhexmartay.

Ardayadii : Macallin ilmo baad dhashay, sow ma aha ?

Macallimadii: Waad xasuusan tahay illayn.

Ardayadii : Waa lagu qabaa, sow ma aha ?

Macallimadii: Waad ogtahay illayn !

Ardayadii : Walaashay ilmay dhalaysaa.

Macallimadii: Habaryar baad noqonaysaa.

Ardayadii : Haa ! Laakiin walaashay lama qabo.

Macallimadii: Ooh !

Ardayadii : Markaad ilmo dhalaysid, ma waxaa wanaagsan in lagu qabo ?

Macallimadii: Maxay adiga kula tahay ?

Ardayadii : Dadka guriga jooga oo dhammi waa caraysan yihiin, aniguse aad baan u faraxsanahay.

Macallimadii: Waxaad ku faraxsan tahay, habaryar baad noqonaysaa.

Ardayadii : Haa ! Waxaanse jeclaa in dadka oo dhammi faraxsanaan lahaa.

Macallimadii: Inay farxadda kula qeybsadaan baad jeclaan lahayd ?

Ardayadii : Haa ! Haa !

Ardayadii waxoogaa markay aamusnayd bey macallimadii ku boodday oo dhunkasho ku waashay.

Sheekadan dhexmartay macallimadda iyo ardayadda, macallimaddu waxay muujisay dulqaad iyo waxgaradnimo. Waxay garatay dareenka ardayadda. Waxay daristay siday ardayaddu inay wax u dhacaan u jeceshahay. Ardayaddiina meeshay rabtay macallimaddii markay martay bey farxadi qarisay.

## ISU DHEELLITIRKA XIISADDA

Marka macallin fasal wax ka dhigaayo waxaa fiican inuu isu dheellitiro cashar bixinta. Waa in weydiinihiisu noqdaan kuwo ku baahsan ardayda oo dhan. Aan tusaale u soo qaadanno macallin fasalka Labaad u dhigaayey Xisaab iyo Xaliimo oo 7 jir ah waxa kala gaaray.

Xaliimo : Carruurta kale baad iga jeceshahay !

Macallin: Ma sidaas bey kula noqotay ?

Xaliimo : Haa ! Waayo aniga waxba marna imaad weydiin.

Macallin: Ma inaan su'aalo ku weydiiyo baad jeclayd ?

Xaliimo : Haa !

Macallin: Waad mahadsan tahay Xaliimo! Iminka wixii ka dambeeya ha inoo ahaato. Mar walba anigaa ku weydiin doona.

Waxaan sheekadan ka aragnaa sida macallimaddu u oggolaatay inay khaldanayd iyo siday u ixtiraamtay dareenka ardayadda.

## GABA-GABO

Macallinka toosani wax dhibaato ah lama kulmo. Quwad ma adeegsado. Waano xad-dhaaf ah sooma jeediyo. Carruurta dhibaatadooda ma daba galo, ballanqaadna kama dalbo. Iskuma dhibo ardaygu wuxuu hore dhibaato u gaystay. Kama faaliyo ardaydu waxay yeeli doonaan mustaqbalka.

Macallinka toosani waxa qudha ee uu isku dhibaa waa waqtiguu joogo siduu wax u hagaajin lahaa. Wuxuu ku dadaalaa ardayga dhibaataysan ee markaa jooga siduu wax u tari lahaa. wuxuu xooggiisa saaraa daqiiqad kasta oo uu fasalka joogo siday u noqon lahayd mid ardayda faa'iido u leh. Macallinka intaa laga helaa waa macallin toosan, waana ka ugu faa'iido badan uguna nolol wanaagsan.

## QAYBTII LABAAD

# *MACALLINKA QALLOOCAN*

## MACALLINKA QALLOOCAN

Waxaan soo aragnay macallinka toosan kuu yahay iyo astaamaha gaarka u ah; bal iminkana macallinka qalloocan astaamihiisa aan eegno.

Macallimiinta oo dhammi waxay qabtaan shaqo xoog leh oo aad u adag. Ardaydu waxay qabaan baahi aan dhammaad lahayn, macallinkuna si aan kala go' lahayn buu baahidaa uga jawaabaa.

Iyada oo ay sidaas tahay baa macallimiinta qaarkeed waqtigooda, ku lumiyaan arrimo dhibaato mooyee aan haba yaraatee wax faa'iido ah u lahayn ardayda. Waxay ku daalaan dagaal laga maarmi lahaa. Dugsi kasta waxaa ku khasaara waqti iyo xoog wax weyn qaban lahaa haddii si fiican loo jideyn lahaa. Maalin walba fasallada waxa ka oogan muran, dagaal is af-dhaaf, af-lagaaddo iyo xurgufo kale oo wiiqaya waxbarashada, haddii si dhab ah loo fiiriyana ah wax laga fogaan karo lagana maarmi karo.

Bal haddaba arrimaha macallinka qalloocani ku kaco aan tusaalooyin ka soo qaadanno, iyaga oo ay tusaalooyinku yihiin in laga shidaal qaato oo ay noqdaan baraarujin lagaga fogaanayo kuwo kale oo badan.

## CAYDA TOOSKA AH

Macallin baa fasal soo galay, ardaydiina waa is wada taagtay. Ardaydii buu yiri fariista. Waxaa fariisan waayay arday la yiraahdo Khaliif. Macallinkii oo caraysan baa ku soo jeestay oo ku yiri. «Khaliif ! ! Maxaa ku taagay? Maxaad sugaysyaa? Ma keligaa inaan fariiso ku

iraahdo baad doonaysaa ? Intaad fadhiisanayso maxay qarni u qaadataa ? Ma Ilaah baa sidaa kuu abuuray ? Mise waxaad doonaysaa qof ku caawiya oo ku fadhiisiya ?».

Khaliif naxdin awgeed bey lugihii hayn waayeen. Sidii qof xabbadi ku dhacday buu isaga oo indhaha ka bilig-biligsiinaya kursigii ka hooseeyey ku dhacay.

Macallinkii wuxuu bilaabay sharraxaad, isaga oo markiiba ilaaway dhibaataduu Khaliif u gaystay. Khaliif waxa macallinku ku hadlaayo iyo wuxuu dhigaayay midna ma maqlayn. Wuxuu ka fekerayey aflagaaddadii macallinku u geystay siday uga muuqan karto. Waxaa khayaalkiisii tusay macallinkii oo dhintay oo kafantii loo geynayo, aaskiisii iyo tacsidiina loo diyaar garoobayo.

Hadallo af-lagaaddo ahi inay macallinka iyo ardayda dhexmaraan waa wax aad u qallafsan. Waxaa ka dhasha oo qura naceyb iyo aargoosi. Macallinku markuu arkay Khaliif oo taagan waxaa ku fillayd ujeeddadiisana uu ku gaari lahaa isaga oo yiraahda, «Khaliif, casharkii baan bilaabayaa». Haddii markaa Khaliif fadhiisan waayo, waxaa macallinka ku fillayd, «Khaliif, marka fasalka oo dhammi fadhiisto, adiga keligaa waxa ku taagay waa iga yaabiyeen».

## KAFTAN QODAX AH

Macallin baa laba taswiirood fasalka la soo galay oo ardaydii weydiiyay tan wanaagsan. Ismaaciil oo 12 jir ah baa wuxuu odhan lahaa aad uga fekeray oo dhaqso uga jawaabi waayay. Macallinkii isaga oo caraysan buu ku yiri, «Maanta oo dhan fasalkan ku jiri maayo ! Wuxuun dheh, inaad odhan karayso uba malayn maayee ! ». Ardaydii aad bey u qosleen, Ismaaciilna aad buu u khajilay.

Si ardaydu u qoslaan arday kale wax yeelladiisu haba yaraatee ma furra. Ardaygu hadduu gaabiyo huruuf laguma dedejin karo. Fekerka maskaxda ardaygu kuma dhaqsado foorjo iyo yasid. Yasidda iyo quursigu wuxuu keenaa naceyb iyo ku taam aargoosi. Marka dhibaato ardayga la kulanto, wax qabadka macallinku waa inuu noqdaa mid wax tar ah. Macallinku wuxuu Ismaaciil ku odhan karayey, «Ismaaciil, wey adag tahay sida labadan taswiirood loo kala saaraa. Waxaa laga yaabaa inaad midba wax ka jeclaatay. Kee baa adiga qalbigaagu la sii jiraa?».

## MURGIDDA SHAQADA

Macallin baa fasal markuu sharraxaaddii Xisaabta u dhammeeyay, xisaab qaybin ah sabuuradda ugu qoray oo ardaydii ka shaqeeya yiri. Muxubbo oo 9 jir ahi, markay shaqadii xisaabta badhtanka marayso bey ka gadmatay. Macallinkii bey u yeertay oo inuu la riixo weydiisay.

Macallinkii baa is xanaajay oo yiri, «Xaggaad jirtay markaan sharraxaayey? Weligaa wax ma dhegaysanaysid. Goor kasta ciyaar baad ku jirtaa; fasalka ma keligaa inaad fadhido baad moodday? Ma keligaa in wax laguu dhigo baad rabtaa?». Intii xisadda ka hartay Muxubbo waxay mashquul ku ahayd siday fasalka rabshado uga dhex abuuri lahayd.

Macallinkani isaga oo aan ardayadda wax niyad jab ah ku ridin, buu ku fakan lahaa si dhib yar, hadduusan diyaar u ahayn inuu ardayadda caawiyo. Waxaa ku fillayd isaga oo yiraahda, «Xisaabta qaybintu ma dhib yara, waxaan jeclaan lahaa aniga oo iminka kaa dhaadhiciya. Hase ahaatee waqti ma hayee mar kale oo aan labadeennuba firaaqo leennahay ii kaalay».

## NIYAD JEBINTA KA FOGOW

Xuseen oo 10 jir ah, baa macallinkii xisaab isku dhufasho ah sabuuradda kaga shaqee yiri. Xuseen xisaabtii buu dhaqso uga shaqeyn waayay. Isaga oo la rafanaaya buu maqlay macallinkii oo leh, «Afka markaad kala qaaddaba aqoonta adduunka badh baad la degtaa». Ardaydii aad bey u qosleen, Xuseen yaxyax iyo khajilaad buu la dhaqaaqi waayay. Macallinkii mar labaad intuu Xuseen ku jeestay buu yiri, «Cabdi baa xisaabta ka shaqaynayee kursigaagii tag oo labada dhegood si fiican u fur oo dhegayso».

Xuseen markiiba fasalkii niyaddiisii iyo maskaxdiisiiba waa ka baxeen. Wuxuu ka fekerayay oo uu daawanaayay macallinkii oo inta dharkii laga dhigay la karbaashayo. Iska daa laba dhegoode, dhex qudhana xisaabtii kuma dhegaysan.

Macallinkii meeshuu Xuseen caawin lahaa ee jacaylka xisaabta ku beeri lahaa, wuxuu ku dhashay nacayb iyo fogaansho. Wuxuu kale oo ku beeray inuu dugsiga iyo waxbarashadaba naco.

## QUUDHSIGU WAA NIYAD JEBIN

Mooge oo 11 jir ah baa macallinkii ku yiri, «Daaqadda fur». Mooge, daaqaddii buu aad ula raftay oo furi kari waayay. Macallinkii baa ku soo jeestay oo yiri, «Miyaanad daaqad xitaa furi karin? Waxaad taqaan miyaanay jirinba?». Mooge isaga oo aad u niyad xun oo gurxamaya buu kursigiisii ku noqday.

Macallinka hadalkiisii aad iyo aad buu Mooge wax u yeelay, sababta oo ah carruurtu kartidoodu inta ay gaarsiisan tahay kama war qabaan. Weliba waxaa u sii daran oo aad wax u yeela marka aqoontooda iyo kartidooda

wax laga sheego. Canaanta noocaas ahi carruurta ma dhiirrigelisee wax bey yeeshaa.

Macallinku hadduu odhan lahaa, «Waa daaqad dhib miidhan ah. Maalinba maalinta ka dambeysa bey sii adkaanaysaa», oo uu markaa weydiiyo inuu gacan u baahan yahay iyo in kale, Mooge niyad jab kuma dhaceen, waxaana laga yaabi lahaa wuxuu girif leeyaba in daaqaddu furmi lahayd.

## AFKAARTAADA U MEEL DAY

Macallinkii oo sharraxaya taariikhda Ururka Midowga Afrika, baa Sahal oo fasalka 8aad dhigtaa farta taagoo yiri, «Waxay ila tahay, inaan U.M.A. ka baxno, sababtoo ah wax faa'iido ah oo uu leeyahay ma jiro. Waxay qabtaan ma jiro. Waxaa lagu hayaa hadal ! Hadal ! Hadal !».

Macallinkii oo foolkiisa cadho qarisay baa Sahal ku soo jeestay oo yiri, «Waxaan waxba kala ogeyn baad tahay. Caano nuuggaagaa oo kale ma garan karo wax qabadka U.M.A. Maxaad ka garan kartaa halganka U.M.A.? Weli buug U.M.A. ka sheekeynaya ma akhriday ? Joornaal aad akhrido goormaa kuugu dambeysay? Jaahil afka kala qaaday oo matagay baad tahay. U.M.A. la'aantii Afrika nabad iyo xasillooni haysan mayse naga fadhiiso».

Waxaa laga yaabaa in macallinkani U.M.A. aad iyo aad u taageero, hase ahaatee dagaalka uu Sahal ku qaaday mid loo baahnaa ma ahayn. Wuxuu keenayaa naceyb, madax adayg iyo aargoosi. Macallinku inuu quudhsi muujiyo waajib ma aha loomana baahna. Waxay ahayd inuu afkaartiisa si ixtiraam iyo waayeelnimo ku jirto ku muujiyo. Waxaa ku fillayd isaga oo yiraahda, «Sahal, waxaa laga yaabaa inaad saluugsan tahay wax qabadka U.M.A. Waa run oo hawlo badan oo uu u xilsaarraa baa baaqday. Hase ahaatee maxaa dhaama oo aad ku beddeli lahayd ? !».

## DEJINTA ARDAYGA

Mursal oo 12 jir ah baa isaga oo dugsiga ku dhex ciyaaraya iska dillaaciyay shaarkuu gashanaa. Aad iyo aad buu u naxay, markaas buu isaga oo ooyaaya u tegay macallinkii oo yiri, «Hooyaday wey i gawracaysaa ! Haraggay iga siibaysaa !». Macallinkii isaga oo aan oohinta Mursal iyo baqdinta ka muuqata danba ka gelin buu ugu jawaabay, «Maad cagaha dhulka dhigtid oo abraarada iska daysid shaarku ma dilaaceene! Wax la garaaco oo haragga laga siibo waad tahay !».

Markii fasalkii la soo galay buu macallinkii ardaydii khudbad u bilaabay oo ka waaniyay inay rabshadda iska dhaafaan isaga oo Mursal tusaale u soo qaadanaya.

Waa marka u horreysee macallin waa in lagu arkaa dareen dadnimo. Meesha dadku wax ka cambaareeyaan, isagu waa inuu tilmaan bixiyaa. Meesha dadka kale wax ka canaantaan, waa inuu taakulo ka geystaa.

Macallinka toosani Mursal wuxuu ku oran lahaa, «Hooyo inay ku disho inaad ka baqayso waa arkaa. Hooyo waxaan u qorayaa warqad aan ugu sheegayo inaanad ogaan u dillaacin shaarka ee u gee».

## GABA-GABO

Qaybtan macallinka qalloocan ka hadlaysaa arrimahaan ku soo aragnay iyaga oo ah tusaale ee ay jiraan kuwo kale oo badan oo ka daran ama laba mid ah waa arrimo ka dhaca dugsiyadeenna iyo fasallada dalkeenna oo dhan maalin walba. Marka macallimiinta noocaas ahi ma beddelmi karaan ?

Waxaa la yiri, boqor reer Aasiya ahaa baa loo keenay taswiirtii Nebi Muuse. Markaas buu u dhiibay la taliyayaashiisii oo yiri, nabigan bal ka warrama. Dadkii la

talinayay boqorka in badan markay fiiriyeen wejigii nebi Muuse bey yiraahdeen, «Boqorow, waa naxariis laawe, waa iimaan laawe, waa xaasid».

Boqorkii baa yaabay oo u qaadan waayay, waayo Nebi Muuse waxaa lagu yiqiin inuu yahay hoggaamiye naxariis badan, deeqsi ah, oo geesinimo ku darsaday. Boqorkii wuxuu goostay inuu Nebi Muuse u tago oo la noolaado oo runtu waxay tahay ogaado. Muddo dheer boqorkii markuu Nebi Muuse la noolaa buu maalintii dambe yiri, «Nebi Muusow, la taliyayaashaydii wey kuu gafeen. Waxaanad ahayn bey kugu sheegeen».

Nebi Muuse baa ugu jawaabey, «La taliyayaashaadu waxay kuu sheegeen waa run. Waxay arkeen waxaan ka samaysnahay. Waxayse arki waayeen halganka aan ugu jiro in aan is beddelo oo is xoreeyo. Markaa waxaa u muuqan waayay waxaan noqday».

Badanaaba isbeddelka macallinka ku dhacaa wuxuu ku yimaadaa si aan dareen lahayn, waxaase jirta in macallinka qumanaan rabaa uu dadaal u galo siduu ku noqon lahaa mid yeeshay weji arday is-hortaagi kara. Macallin kastaa waa garan karaa arrimaha u keenaya faquuqa, ceebta iyo wax yeellada.

Ninkii la oran jirey Jeemis Jois baa wuxuu yiri, «Taariikhdu waa riyo inaan ka baraarugo aan isku dayaayo», sidaas oo kale qof walba taariikhdiisa waa laga helayaa amuuro murugsan oo qallafsan oo loo baahan yahay inuu ka baraarugo, sida: qawaaniino aan la arkeyn, wax aan caqli gal ahayn oo xadidaaya, cuqdad curyaaminaysa, dareen aan caddeyn iyo caadooyin aan laysku waafaqin.

Si macallinka ay ugu suurtowdo inuu adduunka dabeecadihiisa ku arko indhaha carruurta, wuxuu u baahan yahay inuu noqdo mid u jajaban oo la qabsan kara duruu-

faha carruurta kala soo darsaaya. Da'da iyo waayo aragnimada u dhaxaysa dadka waaweyn iyo carruurta waxaa dabooli kara maskax qaad weyn iyo jawaab sax ah oo ka timaadda macallinka, oo dedda baahida ardayga.

Duruufaha maanta aan bulshada ka arki karro oo uu fahmi waayo baa ardayga ku kallifaaya inuu dagaal qarsoon galo, iska hor-imaadna miciin moodo. Taasi ardayga mararka qaarkood waxay gaarsiisaa inuu naftiisa addoomeeyo isaga oo ilbaxnimo moodaaya. Sidaa darteed macallimiintu xidhiidhka ay maalin walba la yeelanayaan carruurta waa inuu noqdaa mid ku salaysan arrimahaan soo sheegnay oo nooleynaya wejigii iyo dhaqankii wanaagsanaa ee arday, macallin iyo dugsi lahaan jireen.

Dagaalka qarsoon ee ardaydu ku jiraan ee ay ku qaadaan macallinka qalloocan haddaan tusaale gaaban ka soo qaadanno wuxuu noqonayaa sidatan :

Nin maalqabeen ah baa cunto kariye u shaqeeyaad iyo aad u cadaadin jiray. Maalintii dambe buu maalqabeenkii isla yaabay oo goostay inuu raalli geliyo cunto kariyihii, si wanaagsanna ula dhaqmo. Markaas buu maalqabeenkii cunto kariyihii u yeedhay oo ku yiri, «Iminka laga bilaabo si wanaagsan baan kuula dhaqmayaa oo cadaadis dambe ku celin maayo».

Cunto kariyihii baa u qaadan waayay oo yiri, «Oo haddii qadadu kaa yara daahdo ma qaylinaysid miyaa?».

Maalqabeenkii baa ku jawaabay, «Maya ! Qaylo dambe ma jirto».

Mar labaad buu cunto kariyihii yiri, «Oo kafee yara qaboobay haddaan kuu keeno wejiga igaga saydhi maysid miyaa ?».

Maalqabeenkii baa ku jawaabay, «Maya ! Maya ! Arrimahaasi waa dhammaadeen !».

Cunto kariyihii waxoogaa intuu hakaday buu yiri, «Hilibku hadduu yar ... yara qalalo oo shiilimaadku ka bato, mushaharkayga ka jari maysid miyaa ?».

Maalqabeenkii baa madaxa ruxay oo yiri, «Maya ! Arrimahaasi wey dhammaadeen; iminka wixii ka dambeeya waxaan wanaag ahayn igala kulmi maysid».

Cunto kariyihii baa qoslay oo yiri, «Waa yahay, waad mahadsan tahay ! Aniguna iminka laga bilaabo candhuuftii aan maraqa kaaga tufi jiray waan kaa daynayaa».

Ardaydu ama carruurtu fursad bey u haystaan inay maraqa tacliinta candhuuf ka buuxshaan. Taasina mid dani inoogu jirto ma aha ee waa in aan ku dadaalnaa sidii aan u yarayn lahayn aargoosiga ay ku kacayaan carruurtu. Taasna waxaa lagu gaari karaa iyada oo macallimiintu waajibkooda garta oo asluubtii looga baahnaa muujiya.

Waxaan wada ogsoonnahay in dugsiyadeennu u baahan yihiin isbeddel joogto ah iyo tacliin tayadeedu fiican tahay. Waxaan soo aragnay in dhibaatooyinka dugsiyada ka dhaca badankoodu ay ka dhashaan xidhiidhka ka dhaxeeya macallinka iyo ardayga oo xumaada. Sidaa darteed isbeddelka iyo tayada loo baahan yahay waxay iman karaan marka macallinku isbeddelo oo suubanaado oo tooso oo qura.

QAYBTA SADDEXAAD

# *XIDHIIDHKA WADAREED*

## XIDHIIDHKA WADAREED

Xidhiidhka wadareed waxaan uga jeednaa xidhiidhka dhexyaal bulshada dugsiga, gaar ahaan kan dhexyaal macallimiinta iyo ardayda. Xidhiidhka wadareed hadduu tooso uun baan odhan karnaa dugsiyadu waa gaadhi karaan ujeeddadii ay lahaayeen oo ah barbaarinta iyo waxbaridda ardayda ay hayaan.

Markaan ujeedno inaan hagaajino nolosha fasalka halkaan ka bilaabeynaa? Waxaan ka bilaabaynaa midabka aan u yeelayno jawaabta aan ardayga siinayno. Sida macallinku ardayga ula xidhiidhayaa aad iyo aad bey muhiim u tahay. Waxay ardayga ka dhigtaa mid toosan oo xiduban ama mid qalloocan oo khariban. Badanaaba macallimiintu ma tixgeliyaan jawaabta ay ardayga u gudbiyaan, hase ahaatee iyadaa ama qaabilaad ama kala bood keeni karta.

Macallimiinta doonaysa inay ardayda qaabilaad ka helaan waa inay erayada kala boodka keenaya ka dhawrsadaan oo adeystaan erayo qaabilaad iyo isu soo dhawaasho keenaya. Macallinka doonaya inuu ardayga hantiyaa waa inuu marka hore dareenkiisa hantiyaa. Ardaygu marka dareenkiisu fiican yahay uun buu si toosan u fakeri karaa.

Arrinka ugu muhiimsan ee macallimiinta looga fadhiyaa, marka ay la hadlayaan carruurta waa habka ay ula xidhiidhayaan wejiga uu yeelanayo inuu toosan yahay oo noqdaa mid carruurta raalli geliya. Habka macallimiintu ilma ula xidhiidhayaan waa inay noqotaa mid aan huubo lahayn. Sida kolba macallinku ula hadlo baa ilmaha u sheegaysa siday u haystaan ama waxay u qa-

baan. Inta badan hadalkaa macallinku wuxuu xaddidaa mustaqbalka ardayga.

Ilmaha waalidka iyo macallinku ula yimaadiin canaan iyo ceebayn, waano xad dhaaf ah iyo tilmaamo aan u muuqan, hadidaad iyo dacweyn, yasid iyo quudhsi, hanjabaad iyo dhaar; wuxuu ku dambeeyaa cadaawad, edebdarro iyo dadnimo xumo. Haddaba si aan carruurteenna uga fogeyno arrimahaas oo dhan oo ay u noqdaan kuwo hela korriimo fiican, aan isla eegno oo tusaale ka soo qaadanno habka wanaagsan ee la doonayo in waayeelka iyo macallimiintuba ula xidhiidhaan carruurta.

## MABDA'A TOOSAN

Qaybtii 1aad iyo qaybtii 2aad ee buuggan waxaan ku soo aragnay arrimaha macallinka toosani ku dhaqmo iyo astaamaha macallinka qalloocan lagu arko. Macallinka toosani mabda' uu ilaasho iyo macallinka qalloocani mabda' uu ku xad gudbo baa jira.

Macallinka suubani ama toosani sidii wax loo qaban lahaa buu tilmaamaa. Macallinka qalloocanina wixii dhacay buu ka hadlaa. Taas macnaheedu waxa weeye, marka wax dhacaan macallinka qumani wixii dhacay sidii wax looga qaban lahaa buu qiimeeyaa, kan qalloocanina ardaygii khaladka galay buu qabsadaa oo wax yeelladiisa ku dadaalaa. Xidhiidhka toosan iyo xidhiidhka qalloocan ee macallinka iyo ardayga dhex maraana waa kan labadaa macallin iyo ardayda kala dhexmara.

Bal macallinka toosan oo aan u bixinay B iyo kan qalloocan oo aan u bixinay T arrimo isku mid ah oo la soo darsay mid waliba wuxuu ka yeelo aan eegno.

1) Arday baa soo illaaway buuggii xisaabta.
   -Macallin B wuxuu ku yiri. «Buuggii inaad soo qaaddo bey ahayd, la'aantii la socodka darsigu dhib bey kugu noqonaysaa».

— Macallin T wuxuu ku yiri. «Wax qayru-mas'uul ah baad tahay! Maalin walba wax cusub baad la soo kallahdaa ! Haddaadan buug sidan fasalka maxaad ka soo doontay ?».

2) Arday baa khad kaga daatay miiskii macallinka.
   — Macallin B wuxuu ku yiri, «Oow ! Khadkii waa kaa daatay. Waxaan u baahanahay biyo iyo calal ee la soo carar aan iska masaxnee».

   — Macallin T wuxuu ku yiri, «Wax caajis ah baad tahay ! Gacmahaagu ma mayd baa ? Naga tirtir qudhunkaagan oo miiska ii nadiifi».

3) Arday baa dugsiga yimid isaga oo aan soo fool dhaqan, aan shanlaysan, dharkiisuna wisikh yahay.

   — Macallin B wuxuu ku yiri, «Is nadaamintu muuqaalkaaga iyo niyaddaadaba wax bey tareysaa».
   — Macallin T wuxuu ku yiri, «Indhahaad igaga dhacday ! Dharkaagu waa wisikh, timahaagu ma feedhna, xitaa maskaxdaadu waa is dhex taal ! Waar maxaa ku haya ? Haddaadan sidan isu dhaamin fasalka debeddaan kaaga tuurayaa !».

Tusaalooyinkaa aan soo aragnay oo dhan macallin B wuxuu muujiyay niyad fiican oo wixii la qaban lahaa tilmaamaysa. Macallin Tna wuxuu muujiyay nacayb; wuxuu abuuray amakaag iyo jidh-diid. Macallinka hore waa xal doon, kan dambana waa dhibaato abuure.

Wixii la qaban lahaa sheeg, dadnimada ardaygana ha taaban, waa Mabda'a toosan ee macallinka. Garashada mabda'aas uu garto macallinku iyo ku habeynta arrimaha kala geddisan ee ardayga kaga imanayaana waa garashada Xidhiidhka Wadareed. Markuu macallinku mabda'an kula dhaqmo wuxuu ardayda la yeelanayaa xidhiidh toosan oo qallafsanaan iyo iska hor imaad ka dheer.

## CADHADA

Beribaa 500 oo macallin oo meel ku shirsan la weydiiyay bal in ay xasuusan yihiin cashar ay ku qaateen tababarkii macallinimada oo odhanaayay, «Carruurtu wey ku qasi, wey ku wareerin, weyna kaa cadhaysiin, taasina waa waxa qof waliba sameeyo markuu cadhoodo». Macallin baa is taagoo yiri, «Waa ognahay inaan macallinka fiicani cadhoon».

Mar labaad baa su'aal la weydiiyay macallimiintii oo la yiri, «Macallin aan maalintii ugu yaraan mar cadhoonini ma idinku jiraa?», macallin farta taaga baa la waayay. Qaarkood waxay xasuusteen cadhadoodii joogtada ahayd oo aad bey u xanuunsadeen, qaarna waxay sabab uga dhigeen cadhadoodii falkii xumaa ee ardayda kaga imanayay. Kulligood cadho waxay tahay waa ogaayeen oo in badan bey soo martay.

Marka runta loo kaco shaqada macallinimadu waa shaqo aad u culus oo qaab daran oo aan qof waliba haweysan karin. Waa shaqo u baahan degganaan, dulqaad, miyir, dadaal, adkaysi, hubsiino urursanaan iwm. Hase ahaatee markaan dugsiyadeenna u soo noqono ee fiirino fasallada ardaydii intay ka badatay is dul fuushan tahay, baahidooda xad dhaafka ah, rabshadaha lama filaanka fasalka uga dhex dillaacaya; cadho macallinka waxay u tahay lama huraan. Waxaase loo baahan yahay inayan cadhadaasi macallinka cuqdad ku ridin oo ayan ka adkaan. Macallinku ma aha dhagax aan dareen aadami lahayn. Wuxuu leeyahay dareen uu dadka la wadaago oo inuu raalli geliyo ama u dul qaato loo baahan yahay.

Macallinku goor kasta ma dul qaadan karo, waase in uu toosnaadaa. Jawaabtiisu waa inay miisaaman tahay. Dareenkiisa iyo erayada uu ku cabbirayaa waa in ay is keenaan. Cadhadiisa inuu qariyo ma aha. Isaga oo ka-

raaya inuu baraf isa saaro ma aha. Inuu dareenkiisa qiiq ku daboolo ma aha; waa inuu muujiyaa, waase inuu u muujiyaa si asluub leh oo toosan iyo hagaag keenaysa.

Macallinka fiicani muujinta cadhadiisa kama baqo, waayo, wuxuu yaqaan sida loo soo if bixiyo, isaga oo aan waxyeello gaysan. Wuxuu yaqaan sida cadhada loo muujiyo isaga oo aan caytamin. Xitaa marka isaga wax loo dhimo, ardayda erayo cay ah uma quuro. Dadnimadooda iyo dabeecadooda kuma xad gudbo. Waxay la mid yihiin iyo waxay ku dambeyn doonaan ma tilmaamo. Macallinka toosani marku carodo ma qariyo ee wuxu sheegaa waxa u muuqda, wuxu dareensan yahay iyo wuxu filayo. Qofka uma leexdee dhibaatada taal buu abbaaraa. Macallinka toosani ma qariyo cadhadiisa, hase ahaatee wuxuu muujiyaa isaga oo isticmaalaya erayga «ANIGA». Wuxuu yiraahdaa «Anigu waan ka xumahay ... Anigu waan ka carooday ... Anigu waan ka yaabanahay ...». Marna kuma talanbaabo weeraha ay ka mid yihiin, «Xayawaan baad tihiin. Bal waxaad ku kacdeen daya. Saqajaamiin baad tihiin. Xaggee la idinku koriyay? Ayaase idin koriyay? Ayaad is mooddeen ?».

Bare Maxamed baa fasalkiisii soo galay oo arkay fasalkii oo is dhex daadsan. Markaas buu yiri, «Waxaa ii muuqda buug is dhex daadsan. Buugtu inay miista dul yaalliin baa habboon ee sharaftoodu ma aha in dhulka lagu daadiyo». Macallinka qalloocan waxaa laga yaabaa inuu odhan lahaa, «Ey soo ururtay baad tihiin. Meel walba xashiishkiinii baa ka muuqda, wax qayro mas'uuliyiin ah baad tihiin».

Macallinku waa inuu ogaadaa markuu cadhoodo in ardaydu si dhab ah u dhagaysato, taasina khasab ka dhigayso inuu aad u taxadaro oo wixii qallooc iyo xurguf keenaya iska ilaasho

Macallin baa wuxuu yiri, «Xitaa marka aan caroodo ardayda kuma diiqdo. Waxaan nafteyda ku iraahdaa, «Wax faa'iido ah cadho kuma keeneysid ee khasaaraha uun yaree».

Waxaa jira macallimiin aaminsan in ardayda la baro nolosha qallafsan ee bulshada oo af-lagaaddo iyo wax kasta ay soo maraan. Waa dhab oo nolosha bulshadu waa mid adag oo lagu arkaayo tartan qof waliba doonayo inuu wax walba ugu hormaro, isaga oo isticmaalaya xoog, garbin, af-lagaaddo iyo astaamo xun xun oo kale. Marka su'aashu waxay tahay, ardaydana ma nolosha wajigaa leh baan u diyaarinaa ?

Maya ! Ardayda waa in aan u sheegnaa in nolosha midabkaa lihi tahay halaag. Waa in ardayda lagu beeraa siday u beddeli lahaayeen noloshaa oo bulshada uga dhigi lahaayeen mid jacayl, iskaashi iyo kala dambeyni ka dhaxeyso. Taasina waxaa lagu gaari karaa macallin magaca u qalma oo toosnaani ku dhan tahay marka la helo. Macallinkaas oo ah mid ka xoroobay cadawtinimo iyo qalalaase.

## ISKAASHIGA

Macallinka toosani ardayda wuxuu u arkaa in ay yihiin dad aad u murugsan oo awooda jacayl, nacayb iyo dareenno kale oo kala geddisan, ee uma arko inay yihiin dad la siman oo sidiisa u fekeri kara. Ardaydu waxay ku tiirsan yihiin macallimiintooda, ku tiirsanaantaasna waxaa ka dhasha khatar. Si khatartaa looga nabad galo waa in macallimiintu u suurtogeliyaan ardayda wadiiqaday ku gaari lahaayeen xornimada.

Si khatarta loo yareeyo waxaa jira dariiqooyin badan oo la maro. Waxaa dariiqooyinkaa ka mid ah in ardayga loo oggolaado inuu talo ku yeesho nolosha dugsiga. Bal

aan tusaale u soo qaadanno ereyo uû yiri macallin waayo arag ah. Wuxuu yiri, «Waxaan is dareensiiyay in ardayda aan u oggolaado madaxbannaani, ka dibna arrinkaa waxaan ugu dhaqmay siyaabo badan oo kala geddisan oo aan fasalka u keenay. Siyaabahaas aan ku guuleystayna waxaa ka mid ah, maalin maalmaha ka mid ah, aniga oo cashar bixinaya baa roob aad u laxaad lihi bilowday. Ardaydii aniga iyo darsigiiba intay ilaaween bey roobkii daawashadiisii ka soo jeesan waayeen. Waxay bilaabeen qaylo iyo qosol. Halkaa marka xaalkii marayo baan kala dooransiiyay inay roobka aamus ku daawadaan iyo in ay darsiga qaataan oo dhegaystaan. Ardaydii markiiba waa aamuseen, daawashadoodiina way wateen».

Arrinka kale ee isaguna kala boodka yareeyaa waa amarka oo laga maarmo. Sida dadka waaweyniba ay u neceb yihiin in amar ay wax ku qabtaan, bey carruurtuna uga damqataa amarka, maquuninta iyo sarreyn muujinta. Ka soo qaad iyada oo ilmaha lagu yidhi, «Waxa laguu diray qabo ! Su'aalna ha na weydiin !». Taasi carruurta waxay ku dhalisaa niyad jab iyo qallafsanaan.

Bal tusaale aan u soo qaadanno laba macallin oo kala ah B iyo T mid waliba arrin isku mid ah siduu ka yeelay.

Macallin B: Rabshaddu waa ina dhibaysaa.
Macallin T: Rabshadda joojiya !

Macallin B: Xisaabtaan dhigayaa waxay ku taal bogga 60naad.

Macallin T: Buugta xisaabta la soo baxa oo bogga 60naad fura.

Macallin B: Buug baa dhulka yaal.

Macallin T: Buugga dhulka ka qaada.

Macallin B: Albaabku waa furan yahay.

Macallin T: Albaabka xidha.

Waxaan tusaalahan ka aragnaa in macallin B hadalkiisa ay ku jirto ixtiraam iyo qaddarin uuna ka fogaaday amar bixin. Hadalka macallin Tna waxaan ku aragnaa inuu yahay amar bixin. Marka waxaa suuragal ah in macallin Bna carruurta ka helo iskaashi, wada shaqeyn iyo is-adeec, macallin Tna ka helo kala bood, dhego adayg iyo qallafsanaan.

Waxaa jira macallimiin waxay ardayda u sheegayaan aan xaddidi karin oo weero aan loo baahnayn is daba dhiga. Taasina waxay keentaa in ardaydu dhego adayg iyo xiiso la'aan muujiso. Bal aan eegno macallinkan markuu dhammeeyay xisaddii af soomaaliga ee fasalka 2aad doonaya inuu u gudbo xisaddii xisaabta, sida uu ula hadlay ardaydii.

1) Waa yahay, qof walowba, waxaan doonayaa inaad buugga af Soomaaliga dabooshid.
2) Qalmaanta cas-cas hoos gasha.
3) Buugta af Soomaaliga daboola.
4) Buugta af Soomaaliga miiska hoos gesha.
5) Buugta af Soomaaliga fogeeya.
6) Buugta xisaabta la soo baxa oo miiska dul dhiga.
7) Haa ! Waa sax ! Wax walba inaga fogeeya buugta xisaabta mooyee.
8) Si wanaagsan u fadhiista, caajisiin fasalka loogama baahna !
9) Waa Sax ! La soo baxa qalimadii madoobaa.
10) Bogga 16naad fura.

Tobankan amar ee macallinku ardayda u jeediyay looma baahnayn. Waxay keenayaan jidh diid iyo gaabin waxbarasho. Waxaa macallinka ku fillayd oo u faa'iido

badnaan lahayd isaga oo yiraahda. «Waa yahay, waa waqtigii xisaabta. Waxaan maraynay bogga 16naad», ka dibna waxoogaa sugo. Taasi ardayda xorriyad bay u noqon lahayd, iskaashina waa muujin lahaayeen.

## QAABILAADDA

Macallimiinta goor kasta waxa loo sheegaa in ardaydu u baahan tahay qaabilaad iyo ixtiraam; waxaanse loo sheegin sida ay marka ay fasalka joogaan qaabilaaddaa iyo ixtiraamkaa u muujin lahaayeen. Muujinta qaabilaadda iyo ixtiraamku waxay u baahan yihiin af soomaali aan caadi ahayn oo habaysan.

Bal aan eegno tusaalooyinka soo socda. Waxaad xasuusnaataa in marka carruurta lala hadlayo amarku keeno kala bood, codsiguna keeno iskaashi. Tusaalooyinkii oo kala ah Macallin B iyo Macallin Tna waa kuwan :

1) Arday baa macallinkii oo wax sharraxaya su'aal weydiiyay.

   Macallin B: Aan dhammeeyee ii kaadi.

   Macallin T: Waxaad tahay wax edeb daran! Markaan wax sharraxaayo waxba hana weydiin.

2) Iyada oo shaqo fasal gacanta lagu hayo baa laba arday sheeko bilaabayaan.

   Macallin B: Shaqada fasalka iminka in la qabto bey u baahan tahay.

   Macallin T: Miyaydaan hadal mooyee wax kale aqoon? Shaqadaan idiin diray iminka qabta.

3) Ardaydii oo buuqaysa baa macallinkii soo galayaa oo inuu cashar bixiyo u diyaar garoobayaa.

Macallin B: Waxaan jeclahay inaan casharkii bilaabo.

Macallin T: Buuqa joojiya; kulligiin fadhiista. Meesha ma caweyskii aad dabada ruxi jirteen baad moodeen ?

4) Ardày baa isaga oo aan gacanta taagin su'aashii macallinka ka jawaabaya.

Macallin B: Ardayda badankeedu inay ka jawaabto baan jeclaa.

Macallin T: Ayaa kuu fasaxay inaad hadasho. Fasalka ma keligaa baa fadhiya? Fasalka inaad afka qabsato ha isku dayin. Waxaagu waa naf jeclaysi aan loo dul qaadan karin.

Tusaalayaasha aan soo aragnay Macallin T ardayda amar buu siinayaa, macallin Bna amar bixin waa ka fogaanayaa. Macallin B wuxuu tilmaamayaa wixii in la qabto loo baahnaa oo keliya. Sida iskaashigu ku iman karaana waa sida B ardayda ula dhaqmaayo, kala boodkana waxaa keenaya sida T ula dhaqmaayo. Waxaa toosan in macallinku hadalkiisa ku bilaabo (Aniga) haddii uu ardayda wax faraayo, hadduu wax la weydiiyay ka jawaabayana magaca ardayga. Marka macallinku ardayga magaciisa ugu yeero ardaygu waxa uu helayaa arrimaha soo socda :

1) Si wanaagsan buu wax u dhegaysanayaa.
2) Dareenkiisu waa fiicnaanayaa.
3) Rabiddiisu ma lumayso.
4) Ra'yigiisa lama baqanayo.

5) Dadnimadiisu hoos u dhici mayso.

6) Shaki waa ka nabadgelayaa.

## CAMBAAREYNTU WAA NIYAD JABIN

Ibraahim oo 14 jir ah baa dugsiga ka soo daahay. Macallinkii baa ku yiri, «Maantana maxaad odhan doontaa ?».

Ibraahim, sababtuu ku soo daahay buu u sheegay isaga oo aan meelna ka duwin. Macallinkii wuxuu ugu jawaabay, «Waxaad ku hadashay erey kama rumaysan; waayo, waa ogahay waxaad ku soo daahday. Waxaad tahay bakhti caajis ah oo aan jiifka ka kici karin. Haddaadan is toosin salkaagu waa meel xun iyo khasaare».

Waxaan aragnaa in macallinkani u gafay barbaarintii ilmaha. Wax buu cambaareeyay, waa caayay, waana kaga khajiliyay ardaygii. Wuxuu tusaaleeyay in mustaqbilkiisu madow yahay.

Habka waxbarashada cambaareyntu meel kuma leh. Badanaaba ardaydu waxay noqotaa sida wax looga sheego ama sida lagu tilmaamo. Macallinkan waxaa ku fillaan lahayd ardaygana waxtar u noqon lahayd isaga oo yiraahda, «Daahiddu waa xun tahay. Ma fiicna in darsigii oo socda la soo dhex galo oo la joojiyo ee soo dadaal».

Habka waxbarashada iyo barbaarinta weeraha soo socdaa meel kuma laha.

1) Ooyaaye, caaqilkii weynaayow, niyo ku noole.

2) Qayro mas'uul aan isku fillayn baa tahay.

3) Waxaanad u qalmin baad doonaysaa.

4) Iska warran jaajaa-lihiiyow, nacaskii caaqilka ahaayow.

5) Waxaad ku dambayn meel xun iyo xabsi.

6) Dugsiga, reerkiinna, iyo dalkaba waxaad ku tahay ceeb culays badan.

Suudi oo 10 jir ah baa jiidhay sabuuraddii oo riday. Waa naxay. Waa argagaxay. Waa baqday. Meeshuu taagnaa buu ku qalalay. Wuxuu filaayay in lagu yiraahdo, «Waar maxaa kugu dhacay? Miyaad sarkhaansan tahay? Maxaa fudaydka kugu kallifay? Maxaa iminka ku taagay? Maxaad sugi maad sabuuradda toosisid». Hase yeeshee macallinkii sidaa uma hadlin. Wuxuu xasuustay mabda'ii ahaa. «Dhibaatada xal u doon, qofkana wax ha ka sheegin». Markaas buu Suudi ku yiri, «Sabuuraddani madax xanuun bey inagu noqotay. Marka in yar la taabtaba waa iska dhacaysaa. Suudi, ma kuu imaadaa mise waad toosin kartaa ?».

Suudi wuxuu la yaabay jawaabta uusan filayn ee macallinkiisii ka soo baxday. Sabuuraddii buu toosiyay. Dabaashirtii daadatay intuu urursihay buu meeshiina nadiifiyay. Indhihiisa waxaa ka muuqday sida uu ugu farxay iyo niyad samaanta ay ku ridday jawaabtii macallinku.

Waxaan ogsoonnahay in dadka waayeelka ahi marka ay is qaabilaan ay aad isu qaddariyaan. Bal ka soo qaad macallin macallin kale booqasho ugu yimid oo markuu ka tagayey illaaway boorsadiisii ama kiishaddiisii oo uu arkay macallinkii guriga lahaa.

Macallinka guriga lihi boorsada intuu qaado oo ka daba cararo macallinkii tegay ee boorsada illaawey ma odhanayo, «Maqane jooge ah baad tahay ! Maalintaad ii timaadaba shay baad ilaaweysaa. Haddaan madaxaagu kugu dhegganayn waad ilaawi lahayd. Bal waxaan eegi doonnaa maalinta aad mas'uul noqon doonto ee xafashkaaga xasuusan doonto. Anigu addoon qashin-

kaaga ururiya ma ihiye wax dambe gurigayga ha ku ilaawin».

Sidoo kale ma habboona in arday buug soo illaaway lagu yidhaahdo erayadaas oo kale, waayo ilmuhu wuxuu noqdaa waxa uu dadka waaweyn ka arko ama ay ku yiraahdiin. Aan tusaale kale u soo qaadanno nin soo martiyay saaxiibkii oo fadhiistay qolka fadhiga oo kursina ku fadhiistay midna cagaha saaray. Markii ninkii martida loo ahaa arko sida wax u dhacayaan lama filaayo inuu yiraahdo. «Miyaad waalan tahay? Sidaad ugu dhiirratay inaad kabahaaga wasakhda ah saarto kursigayga? Sow adiga aqalkii iga beleeyay ! Mar dambe haddaad waxaas oo kale ku kacdid waxa ku gaara adigaa isu keenay».

Waa khalad in ardayga lagu cabsi geliyo wuxuu la kulmi doono oo lagu yiraahdo wax aan dadka waaweyniba isu quudhin.

## TOOSINTU WAA TILMAAN

Macallin baa ardaydii u diray inay soo qoraan curis. Markii ardaydii u keentay buugtii buu saxay. Arday buu buuggiisii ugu qoray. «Waxaagu waa erayo is dhex daadsan; waxaad mooddaa inuu kugu dhacay daacuun ereyo shuban kugu riday».

Ardaygii markuu akhriyay wixii macallinku qoray aad iyo aad buu u carooday, wuxuu nacay naftiisii iyo macallinkiiba.

Ardaydu toosin iyo tilmaan bey u baahan yihiine canaan iyo naqdi wax uma taro. Ardaygu wuxuu qabtay meeshuu macallinku ka caayayo, waxaa roon inuu sidii loo qaban lahaa tilmaan ka bixiyo.

Haddaan tusaale ahaan u soo qaadanno curiska aan kor ku soo xusnay, macallinka toosani wuxuu ku qori la-

haa, «Ujeeddada ku bilow. Weeraha iyo erayadana wixii aad ka maaranto ka tag».

## SU'AALAHA MACALLINKA

Xidhiidhka wadareed, sida cudurrada oo kale wuxuu ku wanaagsan yahay in dhinaciisa xun laga hortago intuusan dhibaato la iman. Macallinka toosani arrimaha ardayga ku dhalinaya caro, aarsi iyo dambiile inuu yahay waa iska dhawraa. Erayada iyo weeraha keenaya jidhdiid iyo xurguf haba yaraatee ma isticmaalo ama ma adeegsado.

Aan tusaale u soo qaadanno su'aalo uu isticmaalay macallin fasalka 5naad wax u dhigaayay hal xiso gudaheed :

1) Maxaa isbeddel kuu diiday ?
2) Maxaa naftaada uun ku jeclaysiiyay?
3) Maxaa qof walba kugu diray ?
4) Maxaa sida carruurta kale kuu diiday ?
5) Maxaa qaska kuugu wacan ?
6) Maxaa afkaaga goor kasta duryanka ku khasbay ?
7) Maxaa gaabis kaa dhigay ?
8) Maxaa goor kasta ku erya ?
9) Maxaa xayawaan kaa dhigay ?
10) Maxaa goor kasta ku kala daadshay ?
11) Maxaa wax kasta oo aan kuu sheego ku ilowsiiya ?
12) Maxaa doqon kaa dhigay ?

Sideedaba iyada oo ayan wanaagsanayn in ardayda la niyad jabiyo, buu erayga «maxaa» ka sii xag jiraa. Waa eray goor kasta u taagan gallafsanaan. Macallinka toosani isticmaalka «maxaa» waa ka fogaadaa.

## DOC KA YEEDHIDDA ARDAYDA

Mararka qaarkood ardaydu waxay macallinka weydiiyaan su'aalo aan haba yaraatee wax xidhiidh ah la lahayn wuxuu dhigaayo ama sharraxaayo. Tusaale haddaan u soo qaadanno macallin sharraxaaya faa'iidada baabuurta, baa ardayadi ku tiri, «Ayeyday waa bugtaa».

Macallin B: «Ma meel baabuur loo raaco bey joogtaa?».

Macallin T: «Ayeydaa afar lugood ma leedahay? Ayeydaa ma baabuur baa? Maxaa ayeydaa keenay, baabuur baannu sharraxaynee?».

Tusaale kale wuxuu yahay, macallin sharraxaaya dharka aan jidhku ka muuqan, baa arday ku yidhi, «Bisaddayda qolka carruurteeda taabta waa qaniintaa».

Macallin B: «Xidhiidh ma ka dhaxayn karaa dharka aan jidhku ka muuqan iyo bisaddaadu sida ay carruurteeda u ilaaliso ?».

Macallin T: «Maxaa bisaddaada keenay fasalka, waxaannu kuu dhigayno ma dhegaysanaysaa mise bisaddaadii baan kuu diraa ?».

Tusaale kale wuxuu yahay, macallin sharraxaaya Caafimaadka baa ardayadi istaagtay oo tiri, «Macallin, dadka marka la aaso maxaa ku dhaca ?».

Macallin B: «Waa su'aal bini'aadamku kumanyaal sannadood is-weydiinayay oo aan weli jawaab loo helin, waase su'aal aad iyo aad u fiican».

Macallin T: «Ma aqaan. Marka lagu aaso baad ogaan doontaa, annagana noo sheegi doontaa»

Labadan macallin ee B iyo T aad iyo aad bey u kala duwan yihiin. B wuxuu muujiyay ixtiraam, dadnimo iyo garasho uu ardayga ku soo dhaweeyay. Macallin Tna weerar iyo cay buu ardaydii ku qaaday. Taasi waxay ina tusaysaa in macallin B yahay barbaariye toosan. Tna wuxuu ardayda ku beerayaa xaqiraad iyo cuqdad.

## LAFO JEBINTA

Waxaa la rumaysan yahay in qofka wax garadka ahi ogyahay markuu af-lagaaddo jeedinayo. Macallimiintu mar marka qaarkood ula kac bay arday af-lagaaddo lafo jebin ah ugu soo jeediyaan. Macallinka carrabka dheeri wuxuu sumeeyaa jawiga waxbarashada, wuxuuna is-hortaagaa barbaarinta iyo waxbarashada toosan. Ardaydu waxay noqdaan kuwo waqtigooda ku lumiya aar goosi iyo isku buuq.

Tusaalooyinka soo socdaa waa kuwo ka soo baxay macallimiin aan dareesanayn waxyeellada ay gaysanayaan.

1) Waad is cajabisay, waadse lalmataa.
2) Ma laga yaabaa inaad miyirsato ? In dhaweydba lugo kumaad taagnayne !
3) Culimadiinan oo kale weli fasal ay ku kulmeen ma arag.
4) Aqoon aad fasalkan ku fadhido ma lihide, aarmaad beddelataa ?

Macallin waa inuu noqdaa bogsiiye, ee dhaawace inuu noqdo loogama fadhiyo. Marka, macallinku goor kasta waa inuu ku fakiro siduu ardayda u maqashiin la-

haa erayo tusin. tilmaan. iwm. Waa inuu ka digtoonaadaa erayada waabeeyada ah ee carrabkiisu awoodo.

## DEGGENAAN OGOW

Macallinka toosani wuxuu ku dadaalaa inuu ardayda baro siday u qiimeyn lahaayeen dareenkooda. Wuxuu ka fogaadaa inuu ardayda ku rido jahawareer ay garan waayaan in dareenkoodu sax yahay iyo inuu khaldan yahay. Macallinka noocaas ahi arday caraysan kuma yiraahdo, «Waxaad ka carootaa meesha ma yaalliin ama iima muuqdaan». Sidoo kale arday baqanaya kuma yiraahdo, «Waxaad ka baqataa iima muuqdaan». Arday kacsan inuu qaboobo kuma khasbo, arday aan faraxsaneyn inuu qoslo kama doono.

Marka arday baqdini hayso lagu yiraahdo, «Waxaad ka baqataa meesha ma yaalliin». Waxaa sii kordhaaya baqdintii ardayga. Baqdintaasi kuma baaba'ayso ciqaab, kumana yaraanayso. Marka ardayga baqdini gasho waxaa habboon in loo garaabo oo weliba qaddarin lagu daro.

Waxaa jira weedho badan oo badanaaba macallimiinta laga maqlo oo baqdinta ardayda siyaadiya oo la doonayo in macallimiintu deggenaan iyo fiiro dheeri ku daboolaan. Weerahaas waxaa ka mid ah :

1) Wax dhibaato leh ma aha.

2) Wax dhibaato ah kuma haystaan.

3) Dadka oo dhan waa wax wada haysta.

4) Ha ka werwerin.

5) Waa maskax carruureed.

Waxaa fiican in macallinku dhegaysto werwerka ardaygu u soo jeedinayo ka dibna yiraahdo. «Sidee baad

uga bixi kartaa? Jid kale oo kuu furani ma jiraa ?». Badanaaba waxaa dhacda in ardayga naftiisu xal keeno, halkaas oo uu ku baranayo inuu waxa la soo gudboonaada go'aan ka gaari karo.

Waxaa taas garab taal, haddii macallinku fiiro la'aan xal keeno, in ardaygii uusan marna fursad u helin ismaamul iyo isku fillaansho.

## HA HADAL BADNAAN

Ardaydu macallinka hadalka badan ma dhegaystaan. Iyada oo hadal badani macallin loo ogyahay oo ay sharraxaadda ku dheeraadaan iyaga oo dhaadhicin uga dan leh, haddana waxaa fiican in macallinku hadalka dhaqaalaysto oo ka fogaado waxaan faa'iido soo jiidayn. Bal aan eegno tusaalooyinka soo socda :

1) Macow baa qalinkii ka lumay. Macallinkii markuu ogaaday, macallinkii Macow wuxuu ugu jawaabay, «Qalinkii ma heshay ? Waxaan ka yaabbanahay sidaad tiri ... Miyaad cuntay ? Xagguu ka dhacay ? Siduu u ekaa ? Maxaad ku shaqayn ?». Intaa ka dib buu macallinkii Macow qalin siiyay isaga oo ku leh: «Qalinkan hooyo, berri igu soo celi... ama kanna tuur ... Iminka shaqo bilow ...».

Hadalladaa faraha badan ee macallinku is daba dhigay, wax loo baahnaa may ahayn. Waxaa ku fillayd isaga oo qalinka intuu Macow u dhiibo aan juuq u odhan. Macallin kastaa waa inuu ka taxadaraa hadal badnida. Waa inuusan waqtiga ku lumin buug lumay, qalin jabay, warqad la waayay, shaqo guri oo la soo illaaway iyo wax la mid ah.

Macallinku arrimo yar yar oo aan mudnaan lahayn inuu dersiga u baajiyo ma aha. Bal aan eegno arrimaha soo socda oo macallin ka soo yeeray aanse loo baahnayn:

1) Maxamed, duryanka jooji ...

2) Qaarkiin waa fiican tihiin, qaarkiinna shiddo-mii-dhan baad tihiin.

3) Maryan waa fiican tahay, waxaa kale oo fiican Axmed.

4) Suleymaan wax ma dhegaysto.

5) Meesha ma suuq baad moodeen.

6) Meeshu waa fasal, waxbarashaana loo sameeyay.

7) Ardayda wanaagsani ma qaylo badna.

8) Meel qaylo joogto wax laguma baran karo.

Macallinku 7da weerood ee hore waa ka maarmi lahaa, oo waxaa ku fillaan lahayd tan 8aad oo qura.

Haddaba inkastoo macallimiintu caadaystaan ku celcelinta arrimo aan baahi loo qabin, haddana waxaa la ogaaday in dariiqaasi yahay mid waxbarashada hoos u dhigaya oo ardaydu ayan jeclaysan, xitaa macallinku hadduu yahay mid aqoontiisu bad tahay. Sida ugu habboon ee qof kasta wax loo gaarsiin karaa waa in ay noqotaa siduu sheegay ninka la yiraahdo Sawl Biloow oo ah, «Qofka aqoonta lihi waa kan sida wax dadka loo dhacsiiyo yaqaan. Waa sida aabbe ilmihiisii la hadlaya ... naag ninkeedii la hadlaysa ... aqoonyahan jaahil la hadlaaya ... dhakhtar bukaan la hadlaaya iyo qof naftiisa la hadlaaya oo kale».

## DAREENKA ARDAYGA

Macallimiintu badanaaba ma dareensana waxyeellada ama waxtarka hadalkoodu u leeyahay ardayda. Xidhiidhka toosani ardayga wax ma taraa? Ardaydu ma kala sooci karaan hadalka turxaanta leh iyo kan kale ?

Jawaabta ay bixiyaanse waa sidee? Si aynnu su'aalaha ugu helno jawaab shaafi ah aan eegno tusaalayaasha soo socda.

Arday ku edboon xiisadaha macallin B baa ku edeb daran xiisadaha macallin T. Taasi waxay ina tusaysaa in dareenka, falka iyo adaabta ardayguba ku xidhan yihiin macallinka. Ardayga Xarbi la yidhaahdo baa 7 cisho dugsiga ka maqnaa. Markuu maalin siddeedaaddii yimid macallin B iyo macallin T, midba si buu ula hadlay. Xarbi falkiisiina wuxuu noqday mid ku xidhan jawaabahaas. Bal aan eegno jawaabihii macallimiinta:

Macallin B: Xarbi ma timi? Toddobaadkaad naga maqnayd waa ku townay ee bagaad u timi!

Macallin T: Wax lala yaabo ma aha, haddaynu toddoba cisho nasanay, waayo Xarbi baa fasalka ka maqnaa !

Ardaydu markay macallin ku arkaan hadallo qallafsan geeskay geshaan. Waxyaabaha ardaydu aad uga dhiidhiyaan waxaa ka mid ah:

1) Haddaad sidaa yeeli lahayd, sidaad tahay waad dhaami lahayd.

2) Sidii hebel ha noqon.

3) Sidaa inaad yeesho waa kaa filayay.

4) Maxaa kuu diiddan sida hebel.

Arday baa wuxuu yiri, «Anigu weligay macallin wax ma weydiin, waayo jawaabta uu i siinayo baan ka war qabaa. Waxaan ogahay inuu i odhanayo, - waxaas oo kale afka lama soo mariyo - ».

Arday kale baa wuxuu yiri, «Macallimiintu waa dad yaab badan. Waa aadami lama odhan karo. Mararka

qaarkood marka aad suuqa ku kulantiin ee ay kula hadlaan inay dad yihiin baad garanaysaa oo yaab baa ku dilaaya. Laakiin markay fasalka soo galaan waad garanaysaa inay mala-ka-mawd yihiin oo sugayaan inaad khalad gasho oo ay kugu qayshaan. Macallin B-se sidaas ma aha. Xitaa markuu fasalka ku jiro waa dad».

## GABA-GABO

Xidhiidhka wadareed ee dugsiyadu ee hagaagsani ama toosani waa kan toosin kara dugsiyada, tacliintana hagaajin kara. Xidhiidhkaasi ficilka macallinka oo qudha wax tari maayee, wuxuu taabanayaa dhuuxa tacliinta. Iyada oo runtu sidaas tahay haddana dugsiyadeennu kama faa'iideysanin. Si ardayda dadnimadooda iyo noloshooda dambeba u hagaagto sidii la rabay waa in xidhiidhkaa loo habeeyaa.

Sida dareewallada, injineerrada iyo dhakhtarrada, iwm, macallimiinta hawshooda si taabbo gal ah looguma tababarin. Waxaad mooddaa wixii laga sugaa inay yihiin fasal inay galaan uun. Waxaase jirta in macallinka xiisad kasta oo uu galo ay waajib saaran tahay inuu fuliyo arrimaha soo socda :

1) Dhiirri gelinta waxbarashada.

2) Dhiirri gelinta wax wada qabsiga.

3) Abuurka dareen aqoon raadis.

4) Abuurka isku kalsoonaanta.

5) Baabi'inta firkanaxa.

6) Yareynta baqdinta.

7) Baabi'inta niyad jabka iyo isku buuqa.

8) Baabi'inta cadhada.

9) **Ka hortagga qalalaasaha iyo waxyaaba kale oo fara badan ee ka midka ah.**

Macallinku waa waalid oo kale, sidaa darteed xidhiidhka uu la yeelanayo ardayda waa inuu noqdaa mid weji waalidnimo leh. Waa inuu ogaado in ardaygu wuxuu ka faa'iideysanayaa ay ku xidhan tahay habka uu ula xidhiidho. Waa inuu yeeshaa dareen iyo digtoonaan ardayga wax fahamsiin karta, kana dhaadhicin karta. Waa inuu caroodaa marka dareen qalloocani isaga iyo ardayga soo dhexgalo oo markiiba gartaa. Waa inuu eedayn, cay iyo quudhsi ka fogaadaa. Waa in hadalkiisu xor ka noqdaa weero dumin iyo waxyeello keeni kara.

**Digniin:** Macallinku ma noqon karo wax qosol-ku-jab ah, oo haddana waxtar ah. Macallinku isaga oo aan ka tegin dadnimadiisa iyo abuurkiisa waa inuu hub ka dhigtaa xidhiidhka wadareed ee toosan

## QAYBTA AFRAAD

# *HALAAGGA AMMAANTA*

## Halaagga Ammaanta

**Qiimeynta iyo Riyaaqa:**

**Run mise Been.**

**Ammantu waa halaag.**

**Ammaantu waa toosin.**

Labada weedhoodba waa run. Ammaanta qiimeynta ahi waa halaag. Ammaanta riyaaqa ahi waa toosin. Arday lagu yidhi :

1) Inan wanaagsan baad tahay.

2) Aad baad u fiican tahay.

3) Shaqo wanaagsan baad qabatay.

Wax baa la yeelay mooyee wax lama tarin. Waayo, waxay ku beeraysaa firkanax. Waxay ku abuuraysaa ku tiirsanaan. Waxay u keenaysaa is-daafac. Waxay is hor-taagaysaa isku-kalsoonaan, is-toosin, is-maamul iyo is-xadididda, arrimahaas oo u baahan madaxbannaani aan debed laga qiimayn. Waa arrimo u baahan in ardaygu iskii u dhiso una qiimeeyo.

## WEJIYADA AMMAANTA

Ammaantu laba weji bey leedahay. Weji waa waxa aan ilmaha ku leenahay, wejiga kalena waa waxa uu isagu naftiisa ku odhanaayo. Erayada aan ilmaha ku leenahay waa inay noqdaan kuwo riyaaq ah oo wax ka tilmaamaya dadaalkiisa, shaqadiisa iyo wax qabadkiisa. Intaa kaddib buu ilmuhu go'aan gaarayaa oo garanayaa

nooca uu yahay. Taasina waxay keenaysaa in ilmuhu si togane ah isu qiimeeyo, taas oo waxtar weyn ah.

Bal tusaalayaasha soo socda aan eegno. Macallinku wuxuu iska dhawrayaa ammaan qiimayn ah, oo riyaaq weeye ammaantiisu.

1) Maryan ardayad la yiraahdo oo 12 jir ah baa beertii dugsiga si fiican uga shaqeysay.

Macallinkii wuxuu yiri, «Beertii iminka waa hagaagsan tahay. Iminka waa lagu nasan karaa. Shaqo adag baad qabatay. Mahadsanid».

Maryan markaa waxay nafteedii ku tidhi, «Macallinkii shaqadaan qabtay waa jeclaystay. Hawlkar baan ahay». Wuu iska dhawray macallinku inuu yiraahdo, «Shaqo wanaagsan baad qabatay. Qof hawlkar ah baad tahay. Shaqada beeraha si fiican baad u taqaan».

2) Samiira oo 8 jir ah oo aad u far xun baa aad isugu dayday inay farteeda hagaajiso oo far qurux badan qorto. Waxay rafataba maalintii dambe bey far qurux badan oo si nadiif ah u qoran macallinkii u keentay. Macallinkii markuu saxay buu ugu qoray, «far qurux badan baad qortay. Waan ku farxay markaan akhriyay».

Markii macallinkii u dhiibay Samiira buuggii ee ay akhriday wixii ku qorraa bey dhunkatay oo tiri, «far wanaagsan waan qori karaa».

## HADHKA AMMAANTA

Ammaan togane ahi waxay yeelan kartaa hadh ama hoga-tusaale tabane ah. Ammaanta qiimaynta ahi waxay keeni kartaa firkanax iyo kala fogaasho. Waxay joojin kartaa xidhiidhka toosan iyo wada shaqayn joogto ah.

Bal aan eegno tusaalooyinka soo socda :

1) Aamina oo 13 jir ah baa fasalka ka dhex heshay 10 shilin. markaas bey macallinka u dhiibtay. Macallinkii wuxuu Aamina ku yiri. «Inan aammin ah baad tahay. Ilmo waalidkii ku faani karaan baad tahay».

Aamina ammaanta macallinka waa ku naxday. Waayo, carruurta alaabteeda mar mar waa dhufan jirtay. «Ceebtaada macallinku hadduu ogaado muxuu ku odhan doonaa ?», bey is weydiisay.

Waxaa fiicnayd in macallinku riyaaq muujiyo oo yiraahdo, «Waad ku mahadsan tahay lacagta aad heshee keentay».

Ammaantu waxay ku fiican tahay in ay ku ekaato fal kooban oo lala kulmay, ayna noqoto riyaaq. Waa in aan marna ammaan lagu qiimayn dabeecadda iyo wax qabadka ilmaha.

## CADDAALADDA

Macallin baa fasal galay oo cashar bixin bilaabay. Meel dhexe markuu maraayo buu Yuusuf ku jeestoo ku yiri. «Lo'du yey ka tirsan tahay?».

Yuusuf waa garan waayay. Mar labaad buu Baariga weydiiyay oo yiri. «Lo'du yey ka tirsan tahay ?».

Baariga baa markiiba jawaabtii la soo booday oo tiri. «Waxay ka tirsan tahay naaslayda».

Macallinkii baa yiri, «Gabadh wanaagsan! Gabadh wanaagsan ! waad garatay». Macallinkii casharkii buu watey isaga oo aan dareemin dhibaatada uu gaystay. Haddii Baariga jawaabta ay garatay ay ku noqotay gabadh wanaagsan. Yuusuf jawaabtuu garan waayay muxuu ku noqonayaa? Inan xun !

Marka dhanka caddaaladda laga eego qof wax garan waayay xumaan ma siinayso. kii gartana wanaag ma

siinayso. Macallinku waxaa habboonayd inuu Yuusufna jawaabta ugu celiyo. Baarigana ku ayido isaga oo leh. «Lo'du waxay ka tirsan tahay naaslayda».

## AMMAANTA IYO MEEQAANKA

Ammaantu dadka waxay u keeni kartaa magac ama meeqaan xun. Qofkii wax ammaanay waxay ka dhigaysaa ama dhaxalsiinaysaa meeqaan uu noqonaayo kii wax kala shaandhaynayay. Wuxuu korayaa kursigii garsoorka. Wuxuu noqonayaa garsoore sheeganaya awood sare oo uu wax ku kala saarayo.

Macallin shaqadu ku cusub tahay oo markaa la soo qoray, baa macallin shaqada ku raagay u yimid oo u sheegay ra'yi.

Macallinkii weynaa baa ugu jawaabay, «Waa ra'yi aad iyo aad u fiican». Ammaantaasi macallinkii cusbaa aad iyo aad bey wax u yeeshay. Waayo, waxay dhigtay meel ka hooseysa macallinnimadii oo macallinkii noqday. mid aan cidi la tartami karin.

Sidaas oo kale haddii ardaygu macallinkii ammaano oo yiraahdo, «Shaqo wanaagsan baad qabatay macallin. Macallimiinta adigaa ugu wanaagsan. Aad iyo aad baan kuugu faanaa ! Halkaa ka wad !», macallinku uma dul qaadan karo.

Sidaas oo kale ardaydu ammaanta qaarkeed ma qaadan karaan, mana liqi karaan. Ardaydu waxay u baahan yihiin ammaan u riyaaq ah.

## AMMAANTA *I*YO KICINTA

Badanaaba ammaanta qiimeynta ahi waa khatar. Waxay keentaa diiq, farxad la'aan, baqdin iyo shaki. Ardayda ammaanta qiimeynta ahi waxay u keentaa kabid-

naan iyo is-daafac. Waxay u qaadanayaan in ammaanta looga dan leeyahay in ay ku beddelmaan, taasna ama ujeeddadaasna aad bey ula qadhaadhaataa. Taasi waxay ku kelliftaa inay intay ka baxsan karaan ka fakadaan.

Bal aan tusaalayaasha soo socda eegno :

1) Weli oo 12 jir ah baa kubbaddii laaday oo gool dhaliyey. Macallinkii ardayda ciyaarsiinayay baa ku yiri, «Waa cajaayib ! Gool dhaliye weyn baad tahay ! Iminka wixii ka dambeeya gool dhalintu waa kugu adiga».

Weli intaa markuu maqlay buu ciyaartiina ka baxay. Macallinkii baa yaabay. Isagu ammaanta wuxuu ka dhigayey dhiirrigelin; hase ahaatee inay waxyeello keentay arag, la yaabna way ku noqotay.

Ammaantii kaddib weli wuxuu is yiri, «Macallinku kubbad kasta oo aad laaddo wuxuu kaa filayaa inaad gool dhaliso. Goolna ma dhalin kartid oo tii horeba nasiib bey ahayd. Haddii aan ciyaarta sii wadana iska daa gool aan dhaliyee, inaan goolka kuba hagaajin kari waayo baa dhici karta. Marka waxaa la ii qaatay inaan sidayda ku fakado».

Marka macallinka waxaa laga rabay in riyaaqiisu noqdo mid waddo haysta. Waxaa la rabay inuu yidhaahdo «Gool baad dhalisay ! ».

Weli marka, wuxuu is oran lahaa «Macallinku kubbad kasta oo aad laaddid inay gool noqoto kaa filimaayo». Marka, markaa xiga haddii Weli gees mariyo, hadalka la gudboon macallinka waa, «Midig bey ka martay, bidix bey ka martay. Hoos u dhig iyo wax la mid ah».

Hadalladaasi Weli waxay u sahli lahaayeen inuu ka soo reeyo oo kubbadda ku fiicnaado. Waxay kaloo Weli tusi lahaayeen sida macallinku u haystaa inayan ahayn ama ku xidhnayn sida uu goolka u dhaliyey, ay tahay mid

qofnimadiisa og.

Haddii macallinku yiraahdo, «Aad baad u wanaagsan tahay! Cajaa'ib baad leedahay! Xarfaddaadu waa xad dhaaf!». Waxaa laga yaabaa in ilmuhu u tarjumto, «Waan xumahay! Waxba kuma wanaagsani! Saaqid baan ahay».

Riyaaqa aan qiimaynayn ilmaha dabeecaddiisa iyo dadnimadiisa baa ilmaha u suurtogeliya inuu khaldamo isaga oo aan baqdin qabin, kaddibna isa saxo isaga oo aan yaxyaxin.

Muliyo oo ka tirsan Kaaha Oktoobar oo 5 jir ah baa macallimaddii la xaadhay dayrka dugsiga. Macallimaddii intii Muliyo hawsha gacanta ku haysay kolba waxay ku tuurtaa erayo riyaaq ah. Waxay tiraahdaa, «Muliyo, qashinkaas oo dhan ma adigaa isu keenay. Caleentaa faraha badan ma adigaa soo urursháy? Sidan wanaagsan ma adigaa halkan u nadiifiyay? Meeshan muraayad baad ka dhigtay. Waxaas baa shaqo la yiraahdaa! Muliyo aad iyo aad baad u mahadsan tahay».

Erayada macallimaddu Muliyo waa sii dhiirrigelinayeen. Si aan la qiyaasi karin bey hawshii uga qayb qaadatay ilaa ay ka dhammaanaysay. Markii Muliyo hooyadeed timid ee ay istiri kaxee, bey Muliyo macallimaddii ku jeesatoo tiri, «Macallin, shaqadaan qabtay hooyo u sheeg».

Macallimaddii Muliyo dadnimadeeda iyo dabeecaddeeda ma qiimeyn oo wax kama sheegin. May odhan, «Waxaad dhashay inan wanaagsan la'aanteed waxba ma qaban kareen». Macallimaddu Muliyo hooyadeed waxay u muujisay siday ugu qushuucday wax qabadkeeda iyada, oo leh, «Muliyo shaqo xoog leh bey qabatay».

Ammaanta waxtarka lihi, waa tan aan taaban dabeecadda, dareenka iyo dadnimada ilmaha ee ku eg in la

tilmaamo wixii la qabtay oo qura. Intaa kaddib ilmuhu isagaa is qiimaynaya.

## GABA-GABO

Waxaan soo aragnay in ammaantu yeelan karto wejiyo kala geddisan oo la rabo in macallinku si taxadar iyo feejignaan ah uga faa'iideysto. Markaan soo koobno qaybtan ammáanta ka hadlaysa waxaa fiiro gaar ah u baahan laba qodob oo kala ah :

1) Ku dadaal ammaanta riyaaqa.

2) Ka fogow ammaanta qiimeynta.

Waxaa habboon waxbarashaduna ku toosaysaa in goor kasta qiimeynta macallinku u daayo ardayga oo ardaygu fursad u helo inuu is-maamulo oo xorriyad madax-bannaani ah helo.

QAYBTA SHANAAD

# TOOSINTA ASLUUBTA ARDAYGA

## TOOSINTA ASLUUBTA ARDAYGA

Waxaan kulligeen wada ogsoonnahay in dugsiyadeenna asaaskooda ay lahaayeen, dad xubin ka ahaa isticmaarkii dalka gumeysan jiray oo taasina dhashay in dhibaatooyin badan oo dhalay dhaqan habow iyo asluub xumo laga dhaxlay. 1960 markii laba gobol oo ka mid ah shantii qaybood ee gumeysigu dadka Soomaaliyeed u qaybiyay xoroobeen ee midoobeen waxaa la filaayay in tacliinta dugsiyada wax iska beddelaan oo la soomaaliyeeyo, dhaqankii ummaddana la soo nooleeyo. Nasiib darro la malee noqonse weyday.

Kacaanka 21ka Oktoobar markii uu curtayba waxaa gacanta la saaray sidii tacliinta loo soomaaliyeyn lahaa, loo hantiwadaageyn lahaa, loona mideyn lahaa; isla markaa waxaa lagu dadaalay in tacliinta iyo dhaqanka laysku dhafo oo dhaqankii ummadda la xoogeeyo.

Arrintaas guulo laxaad leh baa laga soo hooyay, waxaa aad u kordhay tiradii ardayda, tayadiina aad iyo aad bey u fiican tahay, dagaalna waxaa loogu jiraa sidii loo gaarsiin lahaa heerkii Kacaanku astaystay.

Dugsiyadeenna oo macallimiinta loo diyaariyaa ay yihiin kuwo aad loo soo xulay oo u jajaban inay fuliyaan waajibka saaran, waxay had iyo jeer ku dadaalaan inay soo saaraan arday Soomaaliyeed oo dhaqan suuban, asluub toosan, maskax fayow wata, dalkiisa iyo degaankiisana fahamsan, inuu dadkiisa iyo naftiisa xoreeyana diyaar u ah.

Hawlahaas oo dhan iyada oo macallimiinta Soomaaliyeed guul ka soo hoyeen, ayna ku ammaanan yihiin, haddana in la sii dhiirrigeliyo waa waajib, taas oo macna-

heedu yahay faraska waxaa cidhibta loogu dhuftaa orodka ha kordhiyo.

Marka aan u soo noqonno dugsiyadeennu maanta halkay ku sugan yihiin, guud ahaan aad iyo aad bey u fiican yihiin, gaar ahaan heerka tacliinta, taas oo mahaddeeda ay leeyihiin Kacaanka, W.W.B., Xafiiska Manaahijta iyo macallimiintii gaarsiiyay tacliinta ardayda fasalka fadhida. Iyada oo ay sidaas tahay, haddana dhaliillo yar yar oo muuqda in laysku baraarujiyo waa waajib kulligeen ina saaran. Waa arimo loo baahan yahay in wada-'jir ahaan gacanta loo saaro oo olole lagu qaado, si tacliinteennu u noqoto mid qabsatay dawgii Kacaanku ugu tala galay oo tallaabadeedu sii miigganaato.

Haddaan wax ka taataabanno arrimaha gacan saarka u baahan gaar ahaan qodobka casharkani ku saabsan yahay ee ah asluubta ama akhlaaqda dugsiyada waxay noqonayaan kuwa soo socda :

1) Waxaa jirta arday dugsiyada ka daaha ama saacadaha waxbarashada gooya oo baxsada, taas oo cashar bixinta iyo maamulka dugsigaba shaqo aan loo baahnayn waqtiga kaga qaada.

2) Waxaa jira arday safka iyo gelista fasalka labadaba caga-jiid ku naafeeya oo ka khasaariya waqtigii casharka la qaadan lahaa ardayda.

3) Ardayda qaarkeed baa daryeelka dugsiga, qalabkiisa, dhirtiisa, beerihiisa, musqulihiisa iyo guud ahaan daryeelka nadaafadda intaba curyaamiya oo weliba hadday u suurtowdo waxyeela. Ardayda noocaas ahi waa kuwaan garan cidda leh, waayo hadday garan lahaayeen waxay garawsan lahaayeen inay la mid yihiin qof aabbihii iyo hooyadii gawracaaya.

4) Waxaa jira arday had iyo goor Xafiiska taagan oo ama sabab la'aan dugsiga uga maqnaa oo garwaaqsi

been ah sida ama fasax aan loo baahnayn dalbaysa oo noqday laf dhuunta ku taagan oo shaqadii xafiisku ka tallaabsan weyday.

5) Waxaa jira arday iyaga oo dugsiga Maamulka iyo Macallimiintaba dembi ka galay, haddana waalidkood wax been ah ka dhaadhiciya oo waalidkii oo aan waxba hubsan oo xiiqsan dugsigii yimaado oo buuq, sawaxan, qaylo iyo dagaal ka ridaan oo taasina dhasho is-afgaranwaa, dagaal, cay iyo af-lagaaddo. Taasina waxay haybad dhac, sharaf jab iyo asluub xumo ku tahay dugsiga.

6) Waxaa jira arday macallinkii wax u dhigayey feedh u soo duubta oo la dagaallama, taas oo dil ku ah kala dambeyntii iyo asluubtii macallin iyo arday ka dhaxeyn jirtay.

7) Waxaa jira arday macallinkii wax u dhigaayay aan u arkin macallin ama aabbe oo kale ee u arka nin gayaan ah oo xodxodan kara oo xishood iyo is-mashashuur aan loo baahneyn muujiya, iyo arday macallimaddii wax u dhigaysay inay shukaansadaan isku daya oo isjejebin iyo astaamo kale muujiya. Arrimihaas oo dhammina waxay mugdi gelinayaan xidhiidhkii toosnaa ee suubanaa ee ka dhaxayn lahaa arday iyo macallin.

8) Waxaa iyana ka mida asluub xumida buug li'ida, hu' ama jidh, nadaafad la'aanta, hadal badnida, fadhi xumida iyo iyada oo hadal lala yimaado dugsiga.

Haddaba arrimaha aynnu soo sheegnay oo dhan iyo kuwo kale oo badanba waa kuwo la doonayo in wadajir iyada oo Wasaarad, macallin iyo waalidba laysku duuban yahay olole qorshaysan lagu qaado oo ardaydeenna laga badbaadiyo.

Casharkan waxaan ku qaadanaynaa waxyaabaha asluub xumida ardayda u soo jiida iyo sida looga xoroobi karo.

## CIQAABTA HA KU DEGDEGIN

Waxyaabaha asluub xumida dhala waxaa ugu weyn ciqaabta. Si asluubta fasalka gaar ahaan iyo tan dugsigu guud ahaan u noqoto mid toosan, waa in macallimiintu intay suurtowdo ka war-wareegaan ciqaabta oo isku dayaan wax ardayga toosiya oo waxtar u leh. Bal aan eegno tusaalaha soo socda :

Waxaa la yiri macallin baa dugsi lagu qoray si uu wax uga dhigo. Maalintii ugu horreysay ee uu dugsigii tegay baa loo diray fasal ardayda ku jirtay anshax xumaayeen.

Fasalkii marku foodda gashay ee uu is-yiri kursigii ku fadhiiso buu turuntorooday oo intuu kufay ardayda hortooda wejiga dhulka ku dhuftay.

Ardaydii baa qosol dartii gidaarradii qarxin gaadhay. Macallinkii intuu qun yar kacay buu boodhkii iska jafay oo qumaati isu taagay, markaasuu yiri. «Arrinkani waa casharkii ugu horreeyay ee aan idiin dhigayay. Waxaad ogaatiin in qof kufi karo oo wejiga dhulka ku dhufan karo, haddana is-taagi karo. Nolosha aadamiguna waa la mid, marka wax kasta oo dhaca cilmi baa ku jiree dhayal ha ku dhaafina».

Ardaydii baa mar qura aamustay oo indho taagani ka soo hareen. Intaa kaddib bey macallinkii hadalk intay u qushuuceen sacab isku dareen. Waxaana ka muuqatay inay aad u dareemeen ereyada macallinka oo aad u xiseeyeen kana xumaadeen qosolkii ka fakaday.

Macallinkani cakiraaddii ka dhacday fasalka wuxuu ku beddelay aqoon uu ku dejey ardaydii niyaddoodiina ku hantiyay. Markii dhibaatadu dhacday ardaydii ma xarxaarin oo ciqaab lama soo ordine wuxuu la soo baxay awood dadnimo oo dhalaalisay jawigii kharribnaa ee

abuurmay. Erayadiisii waxay taabteen dareenkii duugnaa ee ardayda, waxayna arkeen in arrimo badan oo ka qarsoonaa intii yareyd daahii ka rogmay.

Nuxurka ama dhuuxa dhisibiliinka suubani waa marka la helo wax beddela ciqaabta oo ciqaabta laga maarmo ama laga xoroobo. Arday ciqaabtii waxay dhashaa caro iyo tacliin diid. Wuxuu noqonayaa mid baqdini hadhayso, mid uur ku taallo garbaduuduubto, mid maxbuus u ah aargoosi.

Ardayga caro la suuxsan ee ay jaha wareeriso go'aan la'aani, wax dhigasho iyo wax akhris waqti uma helo. Mar'ka akhlaaq hagaajin loo dan leeyahay wixii nacayb keenaya oo dhan waa laga fogaadaa, wixii ardayga ku beeraya is-xilqaan iyo toosinna waa lagu dadaalaa.

Asluubta hagaagsan ee ardayga habka lagu helaayo waxaan ka axadhan karaa erayo uu yidhi macallin waayo'arag ah, wuxuu yiri: «Marka horeba waxaan ku xisaabtamaa oo niyaystaa in ardayda dugsiyada la keenayo inay iska haystaan fikrad khalad ah oo ay isu haystaan dad toosan oo fiican. Sidaas awgeed, marka horeba qaddarintooda geed ka go'an baan is'kaga dhigaa. Sidaa darteed, waxaan u abbaaraa si qabow oo deggan oo naxariis iyo ixtiraam leh. Waxaan ogahay in hadalkaygu gaadhayo dareenkooda dadan. Waxaan ku dadaalaa inaanan taataaban hankooda. Waxaan aad uga taxaddaraa inaanan hoos u dhigin is-qiimeyntooda».

Xidhiidhka dhex mari kara dadka ama aadanaha waa mid wajiyo badan leh oo siyaabo badan u tarmi kara. Macallink amaalin walba hawlaha asluubeed ee la soo dersa, sida uu wax uga qabto waxay yeelan karaan laba waji oo kala ah mid keena baaba' iyo hoog iyo mid keena dhismo, farxad iyo guul. Hadalkiisa waxaa ka abuurmi kara iscanbaarayn ama isku soo hilow, caro iyo xanaaq ama na bad iyo xasillooni. Asluubta wanaagsan ee toosan waa

guulo yaryar oo badan oo macallinka si is-daba joog ah ugu soo hoyata, uuna ku xaday qalbiga, dareenka, jacaylka, ixtiraamka iyo guud ahaan dhinaca wanaagsan ee ardayga. Hadduu taas gaadhana waxaa diyaar u ah in uu ardayga dacay geliyo oo dhanku doono u jiido.

Isbeddelka maalin walba dhacaya iyo ilbaxnimada soo kordhaysaa waxay lá timid dhibaatooyin aan dugsiyadu ka fakan, kana fakan karin. Dugsiyadu siday sannado ka hor ahaan jireen macallinka ugu talo galaa waa habowsan yahay. Sannadba sannadka ka dambeeya ardayda soo kordhaysaa waa ka il-dheer yihiin kuwii ka horreeyey iyo macallinkaba. Waxay yaqaanniin erayo badan iyo tabo bulshada ku soo kordhay, taas oo ka timid noloshooda oo kor u kacday iyo is-dhex galkii bulshada oo kordhay. Sidaa darteed, macallinku waa inuu arrimahaas oo dhan ka gaashaantaa. Waa inuu ogaadaa in arrin yar oo fasalkiisa ka dhacaa isla markiiba gaari karo dugsiga oo dhan, isla habeenkiina magaalada oo dhan, lagana yaabo inuu dalka oo dhan gaaro laguna sheekeysto, wuxuu wanaag ama xumo siteyna meel mariyo. Macallinku waa inuu ogaadaa inay ardaydu yihiin miinooyin diyaar u ah inay qarxaan, haddii taxaddar la'aan loo taabto. Wax kastoo yasid, cay iyo wax la mid ah oo ardayga gaaraa waxay qarxin karaan miinooyinkaas.

## IS-HUBINTA

Macallinka doonaya inuu asluubta toosan hirgeliyo waa inuu marka hore isagu la yimaaddo asluub iyo akhlaaq toosan oo suubban. Dhisidda asluubta toosani waa aqal la dhisayo oo kale. Waa inay yeelato sees, gidaar iyo af-saar, siday u kala horreeyaanna loo qabtaa. Sida ayan u dhici karin in aqalka dhismihiisa laga bilaabo af-saarka, ayayan suurogal u ahayn in toosinta asluubta meeshii la doono laga bilaabi karo oo kolba meel loo

boodi karin. Baruhu waa inuu la soo kallahaa asluub toosan iyo akhlaaq wanaagsan.

Looma baahna waji macbuusnimo, looma baahna cay, looma baahna ereyo niyad jabin ah. Waxaa jira dabeecado badanaaba macallimiinta qaarkeed lagu arko oo dhibaatooyin laxaad leh iyo cawaaqib xumo laga dhaxlo oo loo baahan yahay in macallimiintu iska ilaashaan. Dabeecadahaas foosha xun waxaa badankooda ka axadhan karaa ereyo uu yidhi macallin dugsiga dhexe wax ka dhigaa. Wuxuu yidhi : «Waxaan ogaaday inaan ahaa qummane khaldan, waxaa iga muuqan jirey dabeecadaha aan doonayo inaan ardayga ka badbaadiyo. Fasalku markuu buuqo codkayga baan kor u qaadi jiray si ay u aamusaan. Dagaal markuu fasalka ka dhaco xoog baan ku bakhtiin jiray. Ardayga akhlaaqda xun qallafsanaan baan ka hor geyn jiray, ardayga cumuq-cumuqleeyana aflagaaddan ku aamusiyaa».

Macallinku inuu sharafta iyo haybadda macallinnimada ka faraxasho ma aha. Inuu ardayda la yooyootamo ma aha. Ciqaabtiisu ma aha inay noqoto wax laga naxo, sixiddiisuna ma aha in ay noqoto mid caloolxumo dhasha. Waa inuu ku talo galo wax is-dhaafsi, xitaa marka ardaygu isa soo taago. Badanaaba ardaygu akhlaaq xumada waxay ugu kacaan si ay u dhasho inuu muujiyo inuu dadka waaweyn khilaafsan yahay. Wuxuu abuuraa cadho si loo ciqaabo, taasi oo markhaati u noqota khilaafkiisa. Waxaa laga yaabaa inuu qaskaa uu ku dhaqaaqay uusan dareensanayn xilna iska saarin. Isaga oo indhaha isku haysta uun buu qulqulad abuuraa, ka dibna isagaa u dhinta.

Macallinku ardayda noocaas ah, wuxuu kaga adkaan karaa isaga oo aan raacin wadiiqadday doonayaan oo qulquladday abuuraan daba gelin, iyagiina sidaas bay ku badbaadayaan. Waa inuusan u oggolaan inay xukumaan

dareenkiisa iyo jawiga fasalka oo kola ka caraysiin, kola ka farxin. Waa inuu ka taxaddaraa jawaabta ee uusan iska odhan, waxqabadkiisuna noqdaa mid uu doortay ee aan ardaydu ku khasbin.

Xidhiidhka ka dhexeeya macallimiinta iyo ardayda ma aha inuu noqdo mid ay hadhaysay is-xaqiraad. Aargoosiga qarsooni wuxuu dhalaa uun iska hor imaad cusub. Goor kasta ciqaabtu waxay dhashaa khatar, waxaana ka farcama cadowtinnimo, uur-xumo, iyo aargoosi. Marka ardayda qaarkeed ciqaabta u qaataan aargoosi macallinku ka aargoosanayo, kuwana waxay u qaataan nasiib darro la soo deristay. Taasina ardayda waxay ku kalliftaa inay aargoostaan, oo si kale hadday ugu suurtoobi weydo cay bay cuskadaan.

Asluubtu ma aha mid ku sar go'an ciqaabta. Tan tixgelinta mudani ma aha inuu ciqaab asluub xumida u qalanta bixiyo, ee waa dulqaadkiisa. Macallinka asluubta toosan dhisi karaa waa kan ardayda argagaxa ka bi'iya ee is-aamminaad ku beera.

## KA HORTAGGA AKHLAAQ XUMADA

Akhlaaq xumada iyo ciqaabtu ma aha laba arrin oo is-garab yaal oo abaalgud isu noqon kara. Waa laba arrin oo is-dhala oo midba kan kale tarmin karo. Ciqaabtu akhlaaq xumida ma joojiso oo ma baabi'iso. Ciqaabtu waxay ardayga akhlaaqda xun ku dhiirrisaa inuu ku sii dhaqaaqo adaab xumida, inuu raadka dambiguu galay baabi'iyo, si aan loo qaban, iyo inuu ka fakado oo ka fogaado arrimaha tuhunka u keenaya. Marka ardayga la ciqaabo, wuxuu ka fakiraa siduu uga taxaddari lahaa inaan mar dambe la qaban ee kama fakiro sidii uu u noqon lahaa arday baarri ah oo daacad ah.

Waxaan tusaale u soo qaadan karnaa arday dugsiga sare dhigta erayo uu yidhi oo ahaa, «Macallimaddaya-

du waxay noo soo jeedisay hadal dheer oo ay ku lahayd, daacad noqda oo khiyaamada iska dhaafa. Intaan dhegeystay baan hoosta ka qoslay, maxaa yeelay, daacadda ay naga dhaadhicinayso, iyada nafteeda baan aqoon. Waa yo, maalin intaan dugsiga ka daahay baan runtii u sheegay oo ku iri, hurdaa ila tagtay, waxay iigu jawaabtay waxaasi hadal ma aha, markaasay i ciqaabtay. Maalintaa wixii ka dambeeyey sida lagu fakan karaa been in la sheego uun inay tahay anoo fahmay baan daahay markaas baan u soo dhisay waxaan jirin iyana waa iga rumaysatay». Ciqaabtu wax u jeeddo ah oo ay ku hirinaysaa ma jirto Marna ma soo hoynayso toosintii loogu talo galay. Arday naftiisa ku oranaya marka lay ciqaabo, «waan ka soo raynayaa, waan soo wanaagsanaanayaa, mas'uul baan noqonayaa, daacad baan noqonayaa, jacayl baan muujinayaa» haba yaraatee ma jiro. Ardaydu marna is-oran maayaan ciqaabta idinkaa laydinku toosinayaa, ee waxay goor kasta u fahmaan in dadka waaweyn ka faa'iideysanayaan. Runtu waxay tahay in macallinka ku degdega ciqaabta yahay mid beeraya aargoosi. Macallinka adeegsada aflagaaddo iyo xanuujin uu yahay mid abuuraya qalalaase. Macallinka arrimhaa gole keenaana waa mid aan sina uga fakanayn qalalaasaha ka dambeeya iyo dembiyada ka dhasha ficilkiisa.

Waalidka iyo macallimiinta qaarkood waxay ku doodaan, inay khasab tahay in carruurta lagu barbaariyo mas'uuliyadda iyo ixtiraamka, taasna haddii lagu waayo dardaaran iyo waano waa in lagu helaa xanuujin iyo kulayl. Hase ahaatee, arrimaha toosnaanta ku lug leh ee ay ka mid yihiin aamminnimada, taakuleynta, cafiska, si toos ah ardayda looma gelin karo, loomana bari karo. Arrimahaas oo dhan waxaa ardaygu ku baran karaa ficil uu ka arko waalidka, macallinka iyo dadka kale ee ka waaweyn ee uu xidhiidhka la leeyahay. Qofka toosnaanta waa lagu barbaariyaa ee khasab iyo ciqaab laguma gaarsiin karo fiicnaan iyo wanaag.

Haddaba, innaga oo arrimahaas aan soo sheegnay oo dhan maanka ku hayna aan tusaalooyinka soo socda soo qaadanno oo eegno sida looga gabban karo ciqaabta, oo ardayga loogu barbaarin karo wanaagga iyo toosnaanta.

## WARQADO ISU QORISTA

Macallinkii oo sabuuradda ku sii jeeda baa il-qoodha ka arkay Maryan oo Sahra warqad u gudbinaysa. Intuu soo booday buu Sahra warqaddii ka boobay. Warqaddii intuu kala bixiyey buu kor u akhriyey oo ardaydii oo dhan maqashiiyey. Markuu badhtanka maraayo buu mar qura is-taagay. Waxaa meesha ku yiil eray isaga lagu caayayo. Wajigiisii baa guduutay si xad-dhaaf ah buu u carooday.

Intuu Maryan ku soo jeestay buu isaga oo qaylinaya ku yiri, «Wax yahay ma xishootada ahi , sidaad ugu dhiirratay waxan?». Maryan kor uma eegine baroor bay qabsatay.

Macallinkii intaa kuma ekaane intuu madaxa ruxay oo gabadhii gilgilay buu ku hanjabay, «Ilmada yaxaaska ee aad qubaysaa kuma badbaadinayso, waa inaad waalidkaa iigu yeertaa oo aan u sheegaa waxay korsanayaan inay tahay eeyad».

Xurguftan Maryan iyo Macallinka dhexmartay, waxaan ka aragnaa in gafkii Maryan ku kacday uu ka ballaadhan yahay gafka ka dhashay canaantii macallinka. Waxyeellada macallinku geystay waa ka ballaadhan tahay tii Maryan geysatay oo ah gudbin warqadeed. Macallinku dhowr khalad oo culculus buu galay. Waa marka horee sheeko laba gabdhood u dhexeysay buu faafiyey, waa tan labaade kaftan buu meel ka dhac u rogay, waa marka saddexaade degganaantii baa ka hallowday, erayo

qadhaadh buu isticmaalay, dabeecad xumana waa muujiyey.

Gudbinta iyo isu dhiibka warqaduhu waa arrin soo jooge ahaa oo ardaydu weligood waqtiga isku dhaafin jirtay. Arrinkaasina jidh-diid waa ka dhalan karaa, hase ahaatee, dambei weyn ma aha.

Arrimaha noocaas oo kale ah si dhib yar baa looga hortegi karaa. Waxaa macallinku sameyn karaa in uu isaga oo aan akhriyin warqadda uu qabto oo jeexjeexo. Gudbinta warqaduhu inkastoo fal xun ay yihiin, haddana ardaydu in macallinku arko uguma tala gelin. Sidaa darteed, intuu kari karo waa inuu ka war-wareego.

## CAYDA

Macallimaddii oo wax sharxaysa baa maqashay Ismaaciil oo ku dhawaaqay eray saddex xaraf ka kooban oo cay ah. Meeshay is-dhaafin lahayd bay debedda keentay.

Macallimaddii: Waar maxaad tiri?

Ismaaciil: Maxaad u jeeddaa?

Macallimaddii: Waxaan u jeedo waad garanaysaa!

Ismaaciil: Waxaan iri, «bas»

Macallimaddii: Kaa muu ahayn waxaad tiri!

Ismaaciil: Kaas buu ahaa waxaan iri.

Macallimaddii: Kaas muu ahayn kaan maqlay!

Ismaaciil: Marka dhagahaaga eerso!

Macallimaddii: Waad af xuntee, fasalka iiga bax !

Ismaaciil: Fasalkaaga badda kula dhac!

Ismaaciil intuu fasalka orod kaga baxay buu albaabkiina xoog u soo xidhay. Waxaa isku soo hadhay macallimaddii oo weli karaysa iyo fasalkii oo argagaxsan.

Macallimaddani waxay abuurtay rabasho aan loo baahnayn. Waxay ku bilowday iyada oo Ismaaciil ku khasabtay inuu dib ugu dhawaaqo eray ceeb ah, waxayna ku dhammaysay iyada oo ardayda hortooda ku cayday. Haddii fiiro loo yeelan lahaa rabshadan oo dhan waa laga hortegi kari lahaa. Waxaa Ismaaciil ku fillaan lahayd iyada oo macallimaddu indho kulul ku eegta oo aan afka juuq uga odhan. Taas oo caddayn lahayd in macallimaddu aad uga xun tahay wuxuu yiri, hadalna looma baahdeen.

## TIXGELINTA DAREENKA ARDAYGA

Waxaa da'ayay roob ma hiigaan ah oo aad iyo aad u dhibco waaweyn. Meel walba biyo baa qulqulaayay. Ardaydii macallinkii wax u dhigayey intay illaaween bay daaqadihii indhahoodii ka kudiyeen oo daawashadii roobka iyo biyaha qulqulaaya ka dhergi waayeen. Macallinkii wax u dhigaayey baa xanaaqay oo yiri, «Waar waa sidee? miyaydaan weligiin roob da'aya arag? Haddaad debed eegga joojin weydiin kulligiin intaan debedda idiin saaro baan roobka idin dhex taagayaa, waa digniintii ugu dambeysay».

Waa wax la wada garan karo in ardaydu aad u xiisaynayaan roob xoog lihi markuu da'ayo. Markaas oo kale niyaddooda lama hakiyo, waayo, waxbarashadu waxay taabbo gashaa markay qushuuc hesho.

Waxaa loo baahnaa in macallinka naftiisu ku dhiirriyo inay daawadaan roobka si ay ugu duxdo mucjisooyinka abuurka oo ay u furanto dareenkooda qarsooni. Meesha macallinku ka xanaaqay waxay noqon lahayd xiso aad u qiimo badan oo qof walba qalbigiisa farxadi buuxiso oo uu muunsoodo.

## KA HORTAGGA FILANWAAGA

Macallinka, markay ardaydu kula kacaan arrimo qallafsan badanaaba waxay muujinayaan dareen ku duugan oo si toos ah ayan macallinka kala hor iman karin. Mar hadday ardaydu u bogi waayaan habka wax dhigistiisa amaba ay dhaliilaan aqoontiisa waxay muujiyaan shucuur qallafsan oo aad mooddo in ay u wada jiraan. Markaas oo kale waa in macallinku si deggan uga hortagaa shucuurtaas ardayda. Waa inuu kaloo ku dadaalaa inuu habkiisa wax dhigista wax ka beddelo oo ka dhigo mid u cuntama ardayda. Hadday taasi dhici weydo waxaa abuurma arrimo dhala cadowtinnimo iyo aargoosi.

Waxaa la yidhi, macallin baa fasal soo galay. Wuxuu arkay miiskii macallinka oo lagu dul toonshay qolof ukuneed ama qubeed. Markiiba wajigiisii baa is-beddelay. Si xad-dhaaf ah buu u carooday. Gebigiisii oo dhan dhidid baa qariyey.

Intuu ardaydii ku soo jeestay buu yiri : «Ayaa qoloftan miiskayga saaray?». Cidina waa u jawaabi weyday. Mar labaad buu yiri, «Waa fursaddii ugu dambeysaye yaa waxaan sameeyey?». Ardaydii shibtooda bay galeen. Macallinkii baa qaylshoo yiri, «qofkii sameeyey, doofaar fulaya weeye. ee waxaan idin siinayaa fursad kale ee ayaa sameeyey?» Ardaydii shibtooda bay galeen. Macallinkii wuxuu kolba arday ku boodaba, markii dambe buu fasalkii oo dhan saaray oo ciqaab u diray.

Tusaalahan waxaan ku aragnaa in macallinku khaladaad badan galay. Wuxuu muujiyey dabeecad xumo iyo cadowtinnimo. Wuxuu abuuray is-nacayb.

Waxaa jirta in cago jugleyntu ayan dhalin qiraal, cambaareyntuna asluubta fasalka ma hagaajiso. Ciqaabta wadareedna asluubta keli ahaaneed wax ka tari mayso mana toosinayso.

Qubkan ama qoloftan ukunta ama beedka ee ardaydu miiska macallinka saartay, macallinku wuxuu u beddeli karay kaftan qosol iyo isla yaab ardayda ku reeba, taas oo dhibaatada uu ku kacay ka badbaadin lahayd, ardayduna ayan casharkooda ku seegeen.

Haddii macallinku qubka debba isaga daadin lahaa oo odhan lahaa isaga oo qoslaaya, «arday macallin casuunta oo qub ku casuunta baad iigu horreysiin ee armaa madaxiinnuna yahay qub aan waxba ku jirin?» Ardaydu waxaa laga yaabi lahaa inay ka shallaayaan, wax la mid ahna ayan ku noqdeen.

## KA FAA'IIDEYSIGA SUUGAANTA

Macallimiin badan baa ka faa'iideysta Suugaanta, marka dhibaato fasal la soo daristo oo asluub toosin u isticmaala. Meeshay ciqaab wax ku daweyn lahaayeen waxay hub ka dhigtaan gabayo, geeraarro, erayo adag iyo maanso kale. Taasi waxay suuro gelisaa inay ardayga dejiso aqoontiisana kordhiso. Arrinkan waxaa tusaale fiican u noqonaaya sheekada soo socota :

Macallinkii baa wuxuu arkay Maxamed oo 6 jir ah oo Ibraahim qanjaruuftay. Markaas buu macallinkii kor u yidhi, «Wixii dhacay dhug baan u lahaa. La yaab iyo dhabanno hayn baa iga soo hartay. Waa saaqmay waa lay xulay. Dadka looma abuurin in la dibindaabyeeyo». Maxamed markuu intaas oo hadal ahi isu raaceen buu argagaxay. Inkasta oo wixii macallinku ku yidhi oo dhan uusan wada fahmin, haddana ujeeddadii macallinka Maxamed waa gartay.

Macallinku Maxamed uma sheegin oo qura gefka uu galay ee wuxuu kaloo baray erayo iyo hab af-Soomaali oo fiican.

## KA HORTAGGA KHAAKHUULKA

Fasalka waxaa ka baxaayey buuq markii macallinku soo galay. Macallinkii wuxuu arkay Saafi iyo Deeqa oo murmaaya.

Saafi : Qalinkaygii dhaqso ii sii!

Deeqa: Qalinku waa kaygii ee adigu ma lihid

Saafi : Beeno waasad tuug ah baad tahay. Ardayda oo dhan baa og inuu qalinkaygii yahay.

Macallinkii: Labadiinnuba waxaad ku hadlayseen waa maqlaayey ee bal horta qalinka dhibaatada keenay ii dhiiba. Hoo adigu qalinkan, adiguna hoo qalinkan oo wax qoris bilaaba. Marka xisadu dhammaato qofkii qalinka lahaa waa inaan isla meel dhignaa.

Rabshaddii socotay oo dhan macallinku sidaa dhibta yar buu ku dhammeeyey. Waxay ka qaadatay 30 ilbidhiqsi ama nus daqiiqo qudha. Wuxuu iska ilaaliyey muran aan faa'iido dhalayn inuu carruurta la galo. Sidii qofka qalinka lahaa uu ku heli lahaa iskuma hawlin. Wuxuu ka digtoonaaday in muranka qalinkaasi darsigiisa waxyeelleeyo. Si xeel iyo xirfadi ku jirto buu uga gabbaday is-canbaareyntii fasalka ka dhex socotay.

## U-DUL-QAADASHADA CAYDA

Shaafi wuxuu ahaa toban jir, fasalka 5aad dhigta. Aad iyo aad buu u hadal iyo rabsho badnaa. Maalintii dame buu isagoo aad u buuqaya macallinkii soo galay:

Macallin: Shaafi, maxaa kugu kallifay inaad goor kasta guryanto.

Shaafi : Maxaa shaqadaada ka dhigay hooyadii waa...

Macallin: Waxaad ku hadashay waxay igu rideen la yaab iyo caro xad-dhaaf ah, waxayna igu khasbayaan inaanan weligey kula hadlin !

Shaafi markuu hadalkii macallinka maqlay buu aad u yaabay oo afka kala qaaday; waayo, wuxuu filaayey in macallinku dilo oo eryo. Xisadii intay socotay oo dhan mar qudha afka ma kala qaadin. Markay ardaydii oo dhami baxday buu macallinkii oo miiskiisii fadhiya u yimi.

Shaafi : Macallin, miyaad i neceb tahay ?

Macallin: Wax lagugu jeclaado miyaad samaysay?

Shaafi : Macallin, wixii aan kugu idhi aad baan uga xumahay ee raalli ka ahaw.

Macallin: Haddaad ka xun tahay fasalka hortiisa baad ka sheegi, anna markaa raalli waan noqon. Wixii waqtigaa ka dambeeyey.

Shaafi wax weyn baa iska beddelay oo wuxuu noqday arday caadi ah oo loo adkaysan karo.

## WAXA WANAAGSANI DARIIQO WANAAGSAN BEY KU YIMAADAAN

Sheekada soo socotaa waxay ina tusaysaa in waxa wanaagsan lagu gaari karo dariiq wanaagsan oo qura. Arday la yiraahdo Cabdi oo siddeed jir ah baa waxaa dhibaato xoog leh ku hayey ardayda fasalka. Cay, dilmo, masabidaad, midna kama maqnayn. Ardayga arrimahaas oo dhan ka dambeeyey wuxuu ahaa Mayow oo sagaal jir ah. Macallimaddii fasalka u xilsaarnayd markay ogaatay asluub xumada Mayow, waxay ka fakertay in ay kabisiiso suntuu qooshay, haddana wey is-qabatay oo waxay tiri, «Haddaan taas sameeyo waxaan maray wadiiqaddii uu jeexay ee waa inaan asluubta suubban ku soo hagaajiyaa».

Si ay uga fogaato iska hor imaad. Mayowna ugu reebto fal ma illaawaan ah, bay warqad u qortay. Warqaddiina waa tan :

Ardaygaygii Mayow,

Cabdi hooyadii waxay ii sheegtay in inankeedii sannadkan dhibaatooyin xoog lihi la soo darseen oo uu aad iyo aad u niyad xun yahay. «Cay, iyo dilmo baa naftiisii khatar gashay» bey i tiri. Anigana arrinkaasi aad iyo aad buu werwer iigu riday. Waxaan la socdaa waayo'aragnimada aad u leedahay ardaydaad wax la dhigato. Sidaa darteed, waxaa khasab igu noqotay inaan kaala tashado sidaan Cabdi xasillooni ugu heli lahayn. Waxaad ii soo qortaa ra'yigaaga, adiga oo tilmaan cad ka bixinaaya sidaynu Cabdi u badbaadin lahayn.

— Macallimaddaada, Saafi —

Mayow macallimaddii warqad uma qorin, hase ahaatee, dibindaabyadii uu Cabdi ku hayey maalintii baa ugu dambeysay.

Macallimaddu guusha ay soo hoysay waxaa u suurtogelisay, iyada oo ka fogaatay iska hor imaad iyo ciqaab aan jaho lahayn. Waxay ogsoonayd in waxa wanaagsan ayan ka dhalan karin jujuub iyo sandulayn. Jacaylka iyo dhego nuglaanta waxaa abuuri kara oo qura jacayl iyo la xabiib.

Macallimaddu warqadday qortay waxay ahayd mid talo raadis ah oo ka reebban canaan iyo naqdi. Waxay ku abbaarayd sidii xal loo heli lahaa oo qura. Mayow, waxay ula hadashay sidii qof og inuu yahay waxtar, isna wuxuu yeelay siday rabtay.

## DAREENSIINTA HABKA SUUBBAN

Cabdinuur wuxuu ahaa siddeed jir aad u rabsho badan oo aan marna fadhiisan. Wuxuu qubaa buugta.

Wuxuu tufaa candhuuf badan. Wuxuu daadiyaa kuraasta. Markii loogu taag heli waayey toosin, baa maalintii dambe macallin cusubi fasalkii soo galay. Wuxuu arkay foolxumda Cabdinuur ku kacaayo. Isaga oo aan Cabdinuur wax ka sheegin buu yiri, «Cabdinuur wax isdhex daadsan layma tuso ee hareerahaaga nadaafi».

Cabdinuur waxaa wadnihii ka qabtay maalin walba wuxuu kharribay hagaajintooda, ugu dambeyntiina wuxuu iska dhaafay wuxuu hallayn jiray.

Macallinkani wuxuu guusha ku gaaray, asluubta toosan ee uu kula dhaqmay Cabdinuur iyo tilmaamidda uu u tilmaamay wixii Cabdinuur qaban lahaa.

## G A B A G A B O

Qofka macallinka ahi waxaa waajib ku ah in uu goor kasta ku dadaalo siduu ardayga ku badbaadin lahaa, waayo'aragnimadiisa ku kordhin lahaa, iyo siduu noloshiisa caadi uga dhigi lahaa. Xisad kasta oo uu ku jiro Macallinku waa inuu is-weydiiyaa ficilka ugu faa'iidada badan ee uu qaban karo. Taasi waxay macallinka u sahlaysaa inuu iska ilaaliyo khalad-galka, deg-degga, fudaydka, iska hor imaadka. Waxay kaloo korinaysaa dadnimadiisa iyo qaddarinta uu helaayo.

QAYBTA LIXAAD:

# WAALIDKA IYO DUGSIGA

Marka macallinka iyo ardaygu is-qabtaan, maxaa la gudboon waalidka? Ma waxaa la gudboon inuu macallinka la safto oo amarkiisa meel mariyo, mise inuu la safto ilmihiisa adduunka qallafsan liqi la'. Tusaalooyinka soo socdaa waxay waalidka u sahlayaan in uu dhex galo macallinka iyo ilmaha isaga oo aan dhanna gacn siin ama la safan.

## K A A L O

Shukri oo toban jir ah baa macallinkii ku ciqaabay inay weer 50 jeer soo qorto. Shukri markay gurigii timid oo ay fiid tahay bey aragtay inayan shaqadii macallimiinta kale ka sugayeen iyo qorriinkii 50ka weerood ayan wada dhamayn karin. Markaas bey isaga oyday. Hooyadeed baa maqashay oo u timid oo ku tiri, «Shukri hooyo maxaa ku helay?»

Shukri oo aan oohintii joojin baa ku gunuustay, «Shaqadii guriga ee macallimiintu ii soo direen waan wada dhammayn kari waayey. Sababta oo ah macallinkii Af-Soomaaliga baa igu ciqaabay inaan 50 jeer hal weer soo qoro. Ma wax baan akhristaa, mise waxaan faa'iido ku jirin baan caawa oo dhan qoraa? 19 jeer baan qoray mid dambana ku dari maayo! Maxay kula tahay hooyo?»

Duqda warka Shukri wuxuu ku noqday kedis. Intay naxday bey tiri. «Bal ii kaadi aan u yara fekeree». Duqdii oo aad u yaabban baa kursi salka saartay. Waxay niyadda ka tiri, «Gabadhu aad bay u niyad xun tahay. Wax qoristu waa u dhimasho. Ciqaabtan macallinku wax uun bay sii yeeleysaa. Sidee baan ugu caqli celin karaa?».

Duqdii muddo markay fekertay bey goosatay inay waaniso, niyaddana qodobbadan soo socdaa iyada oo ku haysata inay la hadasho oo u caqli celiso. Qodobbadii duqdu qalbiga ku sii guntatay waxay ahaayeen :

1) Werwer u muuji, macallinkana wax ha u geysan.

2) U sheeg inaan macallinka la beddeli karin.

3) U sheeg in macallinka loo dul qaadan karo.

4) Cabashada Shukri oggolow.

5) Cabashada xal u raadi oo qabooji oo ha neefsato ama ha nafisto.

Intaa kaddib bay duqdii u tagtay Shukri oo ay agfadhiisatay.

Hooyo : Macallinku weedhan ma 50 jeer qor buu ku yiri?

Shukri: Haa! Haa! Ma og tahay marka aan 50 jeer qoro ee u geeyo wuxuu ku sameynayo? Ardayda hortooda intuu ku jeexjeexo buu danbiisha qashinka ku ridayaa.

Hooyo : Yaa! Maya! Ma runtaa baa? Haa! Waxa kaa caraysiiyey waa gartay!

Shukri: Fasalkiisa waa uga baxayaa waa in aanan waxba ka yeelin, fasal kale ha ii beddele. Haddaan qofka uu ugu jecel yahay noqon kari waayey, qofka uu ugu neceb yahay waa noqon karaa. Waxba maqli maayo, waxna fahmi maayo! Ha kuba waashee.

Hooyo : Si aad macallinkaa uga xorowdo miyaad tacliinta u dhaafaysaa? Aad baad u niyad jabsan tahay.

Shukri: Haa! Haa!

Hooyo : Shukri, waa kugu raacsanahay waxaad sheegtay. Guurista weedhani kuma hagaajinayso. Damiirkaaga uun bay wax yeeleysaa.

Shukri: Damiirku muu yahay?

Hooyo : Waa sharafta aan nafteenna u hayno.

Shukri: Haddana wax aan faa'iidada lahayn waa in aan 50 jeer qoraa?

Hooyo : Haa! Weliba ma dhib yara. Waxaa laga yaabaa inay saacad iyo wax ka badanba ay kugu qaadato. Waxaan jeclahay in aan ku caawiyo.

Waa shaqo aad u adag. Ma sariirta baad ku dul qori, mise miiska?

Shukri: Sariirta.

Hooyo : Haa. Sariirta baa kuu raaxo roon. Ma shaah baan kuu keenaa mise caano?

Shukri: Shaaha ii keen, hooyo.

Shukri markiiba waxay bilowday shaqo. In yar ka dib bay dhammaysay oo hooyadeed u keentay oo tustay.

Shukri: Waa kan, waan dhammeeyey 50kiiba.

Hooyo : Waxaad goosatay in aad wax qabato, waanad ku guuleysatay. Aad baan ugu faraxsanahay waxqabadkaaga.

Shukri: Ha jeexjeexo imminka.

Hooyo : Ma inaan la jeexjeexin baad jeclaan lahayd ?

Shukri: Haa! Habeen wanaagsan hooyo.

## C A D H O

Geelle, oo 14 jir ah baa qadadii gurigoodii tegay isaga oo macallin aad ugu cadhaysan. Wuxuu ka cadhays-

naa hadalkiisa qallafsan, dabeecaddiisa adag. Wuxuu doonayey in dugsi kale loo beddelo. Hooyadii markii ay aragtay siduu u kacsan yahay bay tiri, «Geelle, waxaad tabanayso, warqad aan macallinka u diro ku qor oo ii keen». Waxoogaa kaddib buu hooyadii warqaddii oo uu soo qoray u dhiibay. Warqaddiina waa tan :

Ku: Macallinkaygii naxariis laawaha ahaa,

Waxaan ku faraxsanahay in aan kuu sheego inaan aawadaa dugsiga uga tegaayo. Waxaan ka xumahay in aad weli carruur wax u dhigayso. Waxaad ku wanaagsanaan lahayd in macallin adiga oo kale ahi wax kuu dhigo. Waxaad tahay yaxaas wax ma garte ah. Waxaa kaa buuxa kibir aanad u qalmin. Waxsan afkaagu ma yaqaan. Goor kasta waxaad tahay wax raqiis ah oo qallafsan «Aamus! Nacasyahaw! Shib dheh!» inaad tidhaahdo mooyee aqoon kale ma lihid.

Waxaad igu sameyn karto ma jirto oo kaa tegay, haddaan kula joogi lahaa nafta waad iga qaban lahayd. Waxaad tahay qofka qudha ee aan weligey nacay.

Ardaygaagii niyadda kaa necbaa
—Geelle—

Geelle, hooyadii intay warqaddii ka qabatay bay tiri, «adiguna agtayda soo fariiso». Warqaddii bay kor u akhriday. Iyadoo ujeeddo ka leh bay haddana qunyar u akhriday. Geelle si fiican buu u dhegeystay. Warqaddu dareenkiisa oo dhab ah bay cabbiraysay. Aad iyo aad buu u farxay markuu erayadiisii afkii hooyadii ka maqlay. Geelle, cadhadii waa ka ba'day. Macallinkiina warqad looma dirin.

## WAAN KU AAMMINSANAHAY

Cali (10 jir): inaan dugsigaa tago ma doonayo, waan nebcahay.

Aabbe: Waa ogahay. Sannadkan kuma wanaagsanayn; macallimiin aad u adag baa laydiin keenay. Waan ogahay inay aad idinku qayshaan oo aad qaylada neceb tihiin.

Cali : Aabbo, hadalkaaga ku celi! Waa macallimiintii ugu adkayd ee aan weligay aan arkay.

Aabbe: Waan ogahay.

Cali : Marka maxaad igala doonaysaa aan kubbad iska cayaaree.

Aabbe: Taas yeeli meysid.

Cali : Waayo ?

Aabbe: Waan ku aamminsanahay. Dugsiga deyn meysid.

## GAR-WAAQSI

Qanbi oo 11 jir ah baa isaga oo cadhaysan guriga yimid.

Hooyo: Hooyo, maxaa dhacay? ma dugsigiibaa wax kugu soo gaareen?

Qanbi : Haa!

Hooyo: Hooyo, maxaa dhacay?

Qanbi : Macallin baa timaha i jiiday annaga oo ciyaarayna oo aad baan u xanuunsaday.

Hooyo: Arrinkaas baad ka xumaatay?

Qanbi : Waxaan filaayey inuu yiraahdo «ciyaarta jooji», ama wax la mid ah, isna dagaal uun buu igu qaaday.

Hooyo: Waxaad jeclayd inuu si dadnimo ku jirto kuula hadlo?

Qanbi : Haa! Haa!

Markiiba Qanbi caradii waa ka degtay, taasna waxaa keentay hooyadii oo dareenkiisii la raacday oo qaboojisay.

## GURIGA LA SUG

Maxamuud oo 12 jir ah baa macallin u diray in uu hooyadii ugu yeero. Duqdii markay timid bay macallinkii sida soo socota u wada hadleen.

Macallin: Inankaaga looma adkaysan karo! Wuxuu ku kacayaa wax aan loo adkaysan karin! Fasalkii oo dhan baa khalkhal iyo rabsho ka dhigay, ee bal talo keen.

Hooyo : Macallin bal aniga iga war sug.

Macallin: Waa yahay, adigaan arrinkii kuu daayey.

Duqdii intay Maxamuud u yeertay bay ula hadashay sida soo socota :

Hooya : Maxamuud, macallinka maxaa idin dhexmaray ?

Maxamuud: Ardaydaan ka qosliyaa oo sida Aw-koombe baan majaajillo sameeyaa.

Hooyo : Aad bay u fiican tahay arday fasalka oo dhan ka qoslin kara, hase ahaatee, macallinkaagii waa ka xun yahay ee maxaa talo ah ?

Maxamuud: Waa inaan joojiyaa!

Hooyo : Majaajilooyinka kugu soo dhaca guriga keen oo annaga noo sheeg, markaas baynu wada qosliye.

Maxamuud: Waa yahay.

Hooyadani siday ilmaheeda ula dhaqantay waa si aad u qiimo leh oo labadii dhanba raalli gelisay. Inankeedii may dagaalin, may ciqaabin, su'aalana may weydiin. Waxay inankeeda u sheegtay in macallinkii ka niyad xun yahay, waxayna u raacisay in majaajilladu fiican tahay. Taasi waxay keentay in inanka naftiisu xal keeno.

## MA KORTAY ?

Muumina (oo toban jir ah): Maanta Maamulaha baa i canaantay.

Hooyo : Oo maxaad samaysay?

Muumina: Markaan fasalka galay baa kursigii ila dhacay.

Hooyo : Kaddib macallinkii baa ka cadhooday miyaa?

Muumina: Maya ee waa karay!

Hooyo : Kaddibna?

Muumina: Ardaydii baa aad u qososhay.

Hooyo : Kaddibna?

Muumina (Oo qoslaysa): Maamulaha buu ii diray oo i canaantay.

Hooyo : Haa imminkaan gartay waxa aabbahaa maanta dugsiga looga yeeray (aamus yar).

Muumina: Hooyo, waa ka xumahay, mar dambena u noqon maayo.

Hooyo : Waan ogahay markaad wax goosato in aad fulinayso oo aad kortay.

Hooyadani waxay guusha ku gaartay iyada oo gabadheeda siisay xorriyadda ay iyadu ms'uulka ka noqonayso, waxqabadkeeda iyo hawlaheeda joogtada ah ugana tashanayso. Tilmaan iyo xaarxaarin midna iskumay dayin.

## KU NOQO

Keenidiid oo 11 jir ah baa gurigoodii yimid isaga oo aad u cadhaysan.

Keenidiid: Waxaan xalay oo dhan ku indho beelay macallinkii igu diid, waxaan sameeyana ma garanaayo.

Hooyo : Inaad xalay oo dhan aad shaqaynaysay waan ogaa.

Keenidiid: Inaan mar dambe ku noqdo niyadba uma hayo.

Hooyo : Waa lagu niyad jebiyey.

Keenidiid: Bal waan ku noqonaaye mar kalena ha diido!

Hooyo : Ma diidayo.

Keenidiid markiiba haddana wuxuu bilaabay in uu shaqadii gacanta saaro. Waxaana suurtowda in marka labaad uu shaqadii sidii loo rabay u qabto.

Sheekadan dhexmartay Keenidiid iyo hooyadii waxaan ka fahamnay in hooyadu aad u caawisay Keenidiid. Inankeeda may cambaarayn, macallinkana af lagaaddo uma geysan. May odhan, «Maxaad shaqo wanaagsan u qaban weyday. Carruur ma tihide sida wax loo akhristo baro. Haddaad ciyaarta yarayso oo aad wax akhrisato dhibaatadaa maad aragteen». Waxayse muujisay werwer iyo ixtiraam ay ku dhiirrigelisay Keenidiid. Taasi waxay sahlaysaa in Keenidiid niyad saafiya shaqadii ku bilaabo.

## WAA LA GAADHI KARAA

Markii sannadkii dhammaaday imtixaannadiina la qaaday bay Saafi oo 16 jir ahi keentay buundooyinkii ay heshay guriga, aad iyo aad bay u liiteen buundooyinkeedu.

Saafi : Meeshan macallinka Baayoolojigu iga siiyey 50, waxaan lahaa 80 ee gabdhaha qaar uun buu buundo wanaagsan siiyaa, tan af-garan weydana cunuhuu qabtaa.

Hooyo: Ma hubtaa inaad 80 heli lahayd ?

Saafi : Haa! Haa! Adigaaba ogaa sidaan u akhristay; markii dambana imtixaanka oo dhan waan gartay oo ka shaqeeyey.

Hooyo: Ma kula tahay in aan macallinkii u tago oo arrinkan kala hadlo?

Saafi : Maya! Maya! Maxaad kala hadli kuma maqlayee. Imminka wixii ka dambeeya dugsigaba waa laga beddelayaaye.

Hooyadani waxay iska ilaalisay muran aan faa'iido ka dhalanayn. Su'aalo shaki dhalin kara sida, «macallinku muxuu keligaa ula baxaa? Maxaad isku og tahay? Maxaad samaysay ee laguugu galay» iyo wax la mid ah may weydiin.

Sida hooyadu imminka Saafi ula dhaqantay waxay ina tusaysaa in gabadhu is-xilqaami doonto oo hawsheeda kafaalan doonto.

## U CAQLI CELIN

Shuuke oo 15 jir ah baa hooyadii u yimid oo ka dacwooday macallinkii taariikhda:

Shuuke: Macallin ma aha! Imtixaanka ma saxo. Shaqada guriga ma eego! Wax dhigistana niyad uma hayo. Waa oday aan qarniganba la socon.

Hooyo : Macallinka waad ka xun tahay miyaa?

Shuuke: Hooyo! Waa caajis lugo leh.

Hooyo : Macallin firfircoon baad jeclaan lahayd. Miyaa ?

Shuuke: Macallinka fasallada kale taariikhda u dhiga baa wanaagsan.

Hooyo : Marka in macallinka kale wax kuu dhigo baad jeclaan lahayd sow ma aha ?

Shuuke: Haa! Haa!

Hooyo : Waa fiicnaan lahayd.

Hooyadani dhibaatadii ilmaheeda haysatay si dhib yar oo dhaqso ah bay u qaboojisay. Waxay ixtiraamtay dareenkii iyo hamigii inankeeda. Macallinka inay daafacdo ama dhibaatada meesha taalla siday iyadu u aragto inay uga warranto iskuma dayin. May odhan, «haddii aad waxbarasho u jeeddo inanyahaw» macallin kastaa wax waa ku bari karaa. Shuuke wuxuu hooyadii ka dhaqaaqay isaga oo haysta in la fahmay, hooyadiina u garawday. Taas weeye, tan badanaaba carruurtu waalidka uga fadhiyaan, waalidkuna inuu ku dhaqmo la doonaayo.

## WAR GELINTA MAAMULKA

Aamina oo 8 jir ah baa aabbaheed arkay inay kabidan tahay oo waxbarasho ayan u jeedin, waxay aad uga cabanaysay macallimad. Hase ahaatee, inkasta oo aabbaheed is-dhaafiyey, haddana wuxuu arkay gabadhii oo maalinba maalinta ka dambeysa nolosheedii sii xumaanayso, intaa kaddib buu maamulihii warqad u qoray. Warqaddiina waa tan :

**Jaalle Maamule,**

Waxaan in badan isku dayey in aan soo dhex gelin shaqada dugsiga iyo ardayda. Waxaan in badan is-dhaafiyey dhibaatooyin wax ka qabasho u baahan, aniga oo ilaalinaya xeerka iyo xushmadda dugsigu leeyahay. Hase ahaatee, dhibaatada maalinba maalinta ka dambeysa soo koraysa ee gabadhayda haysata iyo tacliinteeda oo sii xumaanaysa, waxy igu ridday werwer aad u ballaadhan, taasina waxay khasab ka dhigtay inaan kula xidhiidho. Waxaan ogaaday in gabadhayda la geeyey fasalka ay mas'uulka ka tahay macallimad T. Taasina waxay iila muuqatay inay tahay khalad.

Labadii sannadood ee gabadhaydu dugsigiinna dhiganaysay waxay ku qorrayd fasalka kolba loo dhiibo macallin T. Muddadaaba marba marka ka dambeysa gabadhayda waxaa ku soo kordhayey baqdin, niyad-jab, tacliin nacayb iyo isku buuq. Markaan arrimahaas baadhay waxaan ogaaday in macallin T. tahay macallimad aad u qallafsan, dulqaad yar, oo cadho badan oo aan marna keeni karin inay abuurto jawi waxbarasho. Sidaa darteed, waxay iila ekaatay inaan guto waajibkii waalidnimo ee gabadhayda iga saarnaa oo kaa codsado in gabadha fasal kale la iigu beddelo.

Waxaan aad u xasuusanahay sannadihii ina dhaafay iskaashigii fiicnaa ee ina dhexmaray, si ubadkeenna aan ugu abuurno korriimo habboon, waxaan kaloo ogahay inaad wax kasta ka hormarinayso daryeelka carruurta.

Waxaan dhowrayaa wax qabad dhaqso leh oo kaa soo fula.

**Jaalle Cosoble,**

Warqaddaasi markay gaadhay Maamulihii Dugsiga, waxay ku noqotay filan-waa. Isla markiiba intuu ma-

callin T u yeedhay buu warqaddii akhriso ku yidhi, una sheegay in waalidka ardaydu aad ugu xun yihiin, sumcaddooduna aad u hooseyso, loona baahan yahay inay is-beddel sameyso. Macallin T. maalintaa laga bilaabo falkeedii iyo dadnimadeedii wax weyn baa iska beddelay.

## HA QUUDHSAN XIDHIIDHKA ARDAYGA

Warqadda soo socota waxaa qoray ardayad 9 jir ah, waxayna u qortay macallinkii u dhigayey xisaabta.

Macallinow, magacaygu waa Rooda. Waxaan dhigtaa Fasalka 4aad ee aad xisaabta u dhigto. Waxaan ka xumaaday adiga oo xisaabaha jilicsan oo dhan weydiiya Sahra. Ardayda kalana waxay u baahan yihiin inay helaan fursad sida Sahra. Macallin annagana wax na weydii.

— Ardayaddaada,
Rooda —

Macallinkii ma dareensiin Rooda in uu warqaddeedii helay. Waxay weydiisayna wax kama qaban. Bil ka dib baa Rooda aabbaheed warqad u soo qoray macallinkii iyo nuqulkii warqaddii Rooda, Maamulihii dugsigana ogeysiis siiyey. Warqaddiina waa tan :

**Jaalle Macallin,**

Muddo imminka laga joogo bil baa gabadhaydu warqad ay kaga hadlayso dhibaato ay dareentay kuu soo qortay. Intaan anigu ka warqabo wax jawaab ahi kaamay soo noqon. Waalidka waxaa waajib ku ah inay carruurta baraan, inay baahidooda si ixtiraam leh u codsadaan.

Xataa haddii aad gabadha ugu jawaabi lahayd, «warqaddaadii waan helay, waana ka fiirsanayaa», wa-

xay u noqon lahayd waxtar weyn. Jawaab la'aantu arday jaha wareersan wax ma u taraysaa? Arrinkan oo kale ardaydu ma u qaadan kartaa inaan qaddarin la siin? Waxaan ku rajo weynahay in toosintii habboonayd la heli doono.

— Waalid wanaag jecel,
Axmed —

Waqtigaa intii ka dambeysay dabeecaddii macallinka ee fasalka wax weyn baa iska beddelay. Waxaa bilowday dhaqan cusub oo ah in indho qudha uu macallinkii u yeesho fasalkii.

## GABAGABO

Qaybtan waxaan ku soo aragnay in dugsigu noqonayo meel aan xiise bollin marka niyadda la daboolo, maskaxda la seexiyo, naftana la hafiyo. Macallinka toosani waalidka si habboon waa ula xidhiidhi karaa, isaga oo aan ka cadhaysiin. Macallimiintu iyaga oo illaawaya qallafsanaanta, ardayga waa toosin karaan.

Macallimiinta waxaa ku habboon inay adeegsadaan erayo naxariis iyo jacayl ku dheehan yihiin sida waalidiinta. Waa inay la yimaadaan dareen hagaagsan, jawaabo toosan, weedho dhismo ah, hoggaamin horumar keeneysa iyo tusaalooyin keenaya ixtiraam. Dadku maskaxday la hadlaan, macallinkuse wuxuu la hadlaa wadnaha ardayda. Waxbariddu waxay isu beddeshaa waayo'aragnimo keeneysa qiime iyo mudnaan. Si mudnaantaa loo gaadho waa in macallinku si toosan u gaadhsiiyaa ardayda waayo'aragnimada waxbarashadu sugayso.

QAYBTA TODDOBAAD

# KICINTA DAREENKA ARDAYGA WAXBARASHADA KU LIITA

Waxaan wada ogsoon nahay in ujeeddada laga leeyahay abuuridda Wasaarad Waxbarasho, tababaridda macallimiinta, dhisidda dugsiyada, iyo geynta shaqaale fara badan iyo qalabayntooduba ay tahay ardayga fasalka fadhiya in wax la baro. Haddaan ardaygaasi jirin Wasaarad, macallimiin, qalab, shaqaale iyo dugsiyo midna looma baahdeen.

Haddaba, waxaa khasab noqonaysa in ardayga awgii xoolahaa tirada iyo xooggaba leh loo huray marka ugu horreysaba la fahamsiiyo ujeeddada tacliinta, niyaddiisana lagu beero tacliin jacayl iyo aqoon raadis.

Waxaan ogsoonnahay in ardaydeenna intooda badani tacliinta u haystaan ama u bartaan, marka ay dugsiyada dhammeeyaan in ay ku shaqaystaan oo ku helaan lacag iyo derejo. Arrinkaasi waa mid aad u khaldan lana doonayo in ardayda laga badbaadiyo. Waa in ardaygu u fahmaa una bartaa tacliinta in uu ku kala sooco wixii xun iyo wixii wanaagsan ama ha ahaadeen kuwa uu la kulmayo nolol maalmeedkiisa ama ha ahaadeen kuwa uu la kulmayo mustaqbalka ku soo socda. Qofka Islaamka ah siday waajib ugu tahay inuu barto Quraanka iyo Diinta Islaamka, guud ahaanba isaga oo aan uga dan lahayn inuu ku shaqaysto ee ay tahay waajib saaran bay tacliintuna u tahay waajib in la barto iyada oo niyadda lagu hayo inay faa'iido ka dhalato mustaqbalka.

Su'aasha meesha ku jirtaa waxay tahay ayaa ujeeddada dhabta ah ee tacliinta ardayga fahamsiin kara ?. Su'aashan jawaabteedu waa :

1. Macallinka;

2. Waalidka.

Su'aasha kale waxay tahay sidee ardaygu u noqon karaa mid fahmay nuxurka tacliinta oo goor kasta baadi doonaya aqoonta? Su'aashan jawaabteeduna waa marka macallinku guto waajibaadkiisa oo ardayga niyaddiisa ku baraarujiyo qiimaha aqoonta, tusana in aqoontu tahay ceel malab ah oo aan go'ayn lagana dhergayn.

Arrimahani ma aha kuwo dhib yar oo si sahlan macallinku uga gudbi karo, hase ahaatee, macallinku maadaama uu yahay mid-loo soo tababaray inuu fuliyo hawlaha noocaas ah, waxaa ku filan isaga oo waxqabadkiisa ku dara waxoogaa dadaal iyo feker ah, una dhabba gala arday kasta xaaladdiisa gaarka ah iyo wuxuu u jajaban yahay.

Macallinka hawlaha looga fadhiyo waxaa ka mid ah, in uu ardayga niyaddiisa tacliinta u soo jeediyo. Macallinka darsi intuu bixiyo fasalka ka baxa ee aan xil iska saarin baraarujinta ardayga waajibaadkiisii ma wada buuxin.

Ardayda fasalka fadhida oo aad u kala geddisan oo ay ku jiraan kuwo jirran, kuwo aan soo quraacan iyo kuwo si fiican u soo dhergay, kuwo meel dheer ka soo lugeeyey iyo kuwo baabuur lagu keenay, kuwo waalidkoodu jirran yahay iyo kuwo dhibaatooyin gaar ahi haystaan, waa in macallinku mid walba si gaar ah ula xidhiidhaa oo uga warqabaa hadduu doonayo in waxqabadkiisu uu noqdo mid haleela ujeeddadii laga lahaa oo ah kordhinta aqoonta ardayga iyo taabbogelinta barbaarintiisa.

Macallinka arrimahaas iska xil saara, wuxuu ardayda ka helaa qaddarin gaar ah, waxaana suurogal ah ama dhacdayba in ardaydu dhibaato kasta oo la soo kulanta ay la socodsiiyaan talana weydiiyaan. Taasi waxay macallinka u fududaynaysa fulinta hawshiisa iyo ka hortagga dhibaatooyin dhici lahaa oo khasaare ballaadhan soo jiidi lahaa.

Ardaygu maaddo ma nici karo, haddaan dhibaato kale jirin. Ardaygu wuxuu maaddo nacaa marka hore markuu macallinka dhigga naco ee ay is-keeni waayaan. Waxaana suurtogal ah in ardayga maaddadaa lagu kari waayo inta uu dugsiyada dhammaynaayo, taasi marka khasab waxay ka dhigaysaa in ugu horreynba macallinku ku dadaalo inay ardayga is-fahmaan ama uu fahmo.

Aan u soo noqonno barbaarinta ardayga. Dhibaatada ugu weyn ee arday qabsataa waa marka uu maskaxdiisa sidii la rabay uga faa'iideysan waayo ee intuu cuqdad qaado ay la noqoto inuusan tacliin guul ka soo hoynayn. Haddaba, iyada oo maskaxda ardaydu isku wada mid tahay, ardayga noocaas ah waxaa haysta dhibaato daawadeeda macallinku hayo.

Waxaa la yidhi nin khamri ka soo dhergay oo sakhraansan baa wuxuu jiidhay tiir ama baalle meel cidla ah ka taagan. Wuu wareeray, mar labaad buu dib u gurtay oo soo dhaqaaqay isaga oo aan dhanna u leexan. Haddana wuxuu madaxa ku dhuftay tiirkii. Dib buu u gurtay oo nastay, mar saddexaad buu misana isaga oo aan dhanna u leexan soo dhaqaaqay, haddana tiirkii buu madaxa ku dhuftay. Intaa kaddib buu isaga oo daallan tiirkii hoos fadhiisatay oo ku gurxamay. «Bilaash baan la ordayaa, dhan walba waa la iga soo ceshay, dhan walba gidaar baa iga xiga».

Waxaa ninkaa sakhraansan la mid ah ardaygii aan ka faa'iidysan maskaxdiisa ee u qaata inuu yahay damiin ama umi cuqdadina ku beeranto.

Ardayga noocaas ah dhibaato yari markay la kulantaba waa sii rajo gooyaa, ammaantuna wax uma tarto oo isagaa isu haysta inuu yahay qof liita oo qofkii ku yidhaahda, «waad fiican tahay, waad maskax furan tahay, wax waad qaban kartaa», wuxuu u qaadanayaa inuu ku kajamaayo ama is-footo uga dan leeyahay.

Ardayga noocaas ah waxaa waxyeelleeya oo kale weedhaha soo socda :

1. Haddaad dadaasho wax waad qaban kartaa.
2. Ilaahay garashaduu ku siiyey ha khasaarin.
3. Waligaa ma waxaad ku jiri sidaad imminka tahay.

Carruurta tacliinta waa la jeclaysiin karaa oo waa la dabi karaa, ee khasab wax laguma bari karo. Haddii carruurta tacliinta lagu khasbo waxay la soo baxayaan tabo iyo xeelado ay ku khiyaameynayaan waalidka iyo macallinkaba oo iyaga oo aan waxba baran bay dugsiyada dhammeeyaan.

Khiyaamooyinka ardaydu adeegsato waxaa tusaale fiican inoo noqonaya erayo uu yidhi arday Dugsiga Sare, Fasalka Labaad dhigtaa. Wuxuu yidhi, «Macallinka sida loo khiyaameeyaa waa dhib yar tahay: waxaa layska dhigaa arday firfircoon rabshadna lama sameeyo. Dugsiga lagama daaho, su'aalo xunxunna lama weydiiyo; qallafsanaantana waa layska ilaashaa. Macallinka intaa kaa helana kuma nacayo». Wuxuu intaa ku daray, «maanta waxaan la kulmay Maamulaha Dugsiga oo i weydiiyey waxaan qabanay. Meeshaan uga jawaabi lahaa: Macallinkii Af-Soomaaliga waan indho saabay. Xisadii Xisaabta sheekaan akhrisanayey. Imtixaankii Sayniska waan qishay. Layligii guriga quraacdii baan ka shaqeeyey. Xisadii Taariikhda saaxiibkay baan warqad u qoray. Waxaan ugu jawaabay waxay ahayd maalin aan shaqo xoog leh qabannay oo duruus badan qaadannay. Maamulihiina isaga oo farxadi ka muuqato buu iga tegay».

Waxaan hadalka ardayga ka garan karnaa sida ardaygu been run u eg u sameyn karo oo u qancin karo waalidka iyo macallimiintaba.

Sheekada soo socota oo dhexmartay arday la yidhaahdo Axmed iyo Macallinkii ciyaaraha waxaan ka fa-

hmaynaa arrimaha ardayda tacliinta ku dhiirriya iyo kuwa iska hortaaga.

Axmed wuxuu yidhi: «12kii sano ee aan waxbaranayey intii badnayd waxay ahayd khasaare loomana baahnayn waxaan barannay oo la doonayey inaan matagno marka imtixaan yimaado iyo dadaalkaan ugu jiray raalligelinta macallinka baa noloshii ka dhigay mid aan farxad lahayn. Waxa qudha ee aan ka fakari jiray waa buundo urursi, isku dariddooda iyo qaybintooda. Waxaanse ogaaday inay aqoonta runta ahi tahay midda fasalka debaddiisa taal sida ciyaaraha, doodaha iwm.

Macallinkii wuxuu yidhi: «Ciyaaraha aad baad u danaysaa miyaa?

Axmed: Haa! Ciyaaruhu nolosheyday ka mid yihiin, taasna adigaa mahaddeeda leh, waayo, marka aan khalad galo xitaa igama dhigtid damiin aan wax garanayn, taasina waa hab wanaagsan oo wax loo baran karo.

Macallinkii: Ma waxaad jeceshahay in qiimayn la'aan wax uun laguu baro?

Axmed: Nolosheyda oo dhan waxaan ku soo jiray qiimeyn iyo buundo urursi, waxaadse ogaataa in anigu aan aad ula socdo marka darsi aan fahmayo iyo marka uu iga fakado; marka uma baahni in qof kale ii sheego.

Sheekadan waxaan ka faa'iideysanaynaa in ardaygu u baahan yahay qaddarin iyo sida qudha ee uu wax ku jeclaan karaana ay tahay marka isaga waxqabadkiisa la dhiirrigeliyo.

## HABKA KICINTA NIYADDA ARDAYGA

Macallinka doonaya inuu ardayga tacliinta ku soo jeediyo, waxa ugu horreeya ee inuu ku dhaqaaqo la doo-

nayo waa inuu ardayga fahamsiiyo in waxbarashada iyo khalad-galku yihiin wax wada socda. Waxyaabaha waxbarashada is-hortaagaa waxaa ugu weyn baqdinta. Baqdin ardaygu ka baqanayo inuu guul soo hoyn waayo, la naqdiyo, loo arko inuu yahay damiin aan waxba fahmayn.

Macallinka wanaagsani waa kan ardayga fahamsiiya in khalad la geli karo. Ka xorowga baqdintu waa gaadhida dadaalka iyo wax isku dayga. Oggolaanshaha gafkuna waa dhiirrigelinta waxbarashada.

Macallin baa si uu waxbarashada u dhiirrigeliyo baqdintana looga xoroobo ardaydii u furay dood ay ku falanqaynayaan khaladaadkay hore u galeen. Ardaydii markay muddo doodeen, dhibaatooyinka khaladaadkaasi u geysteenna ay ka warrameen bay macallinkii iyo ardaydii oo wada jiraa soo saareen xeer fasalkoodu ku dhaqmayo oo far waaweyn intay ku qoreen fasalka ku hor dhejeen. Xeerkuna wuxuu ka koobnaa qodobbada soo socda:

1. Fasalkan khaladku kama reebbana.
2. Khaladku ma aha wax laga argagaxo.
3. Waad khaldami kartaa, hase yeeshee, ha ka nixin, ha ka cadhoon,
4. Khalad wuxuu u dhacaa in la saxo.
5. Qiimee saxiddaada, ee qiime ha u yeelin khaladkaaga.
6. Khaladku inuu kaa adkaado ha u oggolaan.

## KOR U QAADKA CODKA

Mar-marka qaarkood arday aan tacliinta ku liidan baa loo qaadan karaa inuu damiin yahay. Taasi waxay ka dhalataa arrimo badan oo ay ka mid tahay baqdintu.

Waxaa jirta ardayga noocaas ahi inuusan ka qayb qaadan doodaha fasalka iyo ka jawaabidda su'aalaha macallinka. Haddaan tusaale u soo qaadanno ardayad la yidhaahdo Samiira oo Fasalka 4aad dhigata dhibaato baqdineed oo haysatay, waxay ahayd sida soo socota :

Macallinkii Af-Carabiga baa Samiira ku yidhi, istaag oo darsiga akhri. Samiira waxay ku akhriday cod qabow oo aad u hooseeya oo aan la maqlayn. Hag-hago bay yeelatay, erayada qaarkoodna waaba ku dhawaaqi kari weyday. Ugu dambeystiina codba waa ka soo bixi waayay oo wey aamustay. Aad iyo aad bay u yaxyaxday oo buuggii bay wajiga iska saartay oo isku qarisay.

Macallinkii baa ku yidhi, «kor u akhriga Carabigu ma dhib yara, waxaa laga baqdaa, khalad iyo in lagugu qoslo. Istaagga iyo akhriska naftoodu waa arrimo aad iyo aad geesinnimo ugu baahan. Isku daygaagu aad buu u fiicnaa ee fariiso Samiira». Maalintii dambe markii macallinkii Samiira ku yidhi, «Istaag oo akhri» intay istaagtay bay si fiican u akhriday.

Samiira waxaa u suuro geliyey in ay horumar sameyso hadalladii macallinka. Maalintii hore macallinku lama hadlin Samiira ee wuxuu ka hadlay dhibaatadii Samiira haysatay. Wuxuu muujiyey inuu fahamsan yahay waxa ay Samiira ka fekeraysay. Wuxuu iska ilaaliyey in uu ammaan khali ah u soo jeediyo Samiira oo yidhaahdo; «Waad wanaagsan tahay. Mar labaad ku celi oo bal akhri. Codkaaga kor u qaad. Marmar khalad waa la sameeyaaye ha baqan», iyo wax la mid ah. Erayadaasi inkasta oo ay samo ka talis yihiin, haddana ardayda ma dhiirrigeliyaan.

## SOO SAARIDDA KARTIDA QARSOON EE ARDAYGA

Arday waliba waxaa laga yaabaa inuu ku fiican yahay maaddo gaar ah, markaas oo kale waa waajib saaran

baraha inuu soo if-bixiyo kartida ku duugan oo weliba ku dhiirrigeliyo. Bal aan tusaale u soo qaadanno arday dhigta fasalka lixaad oo la yidhaahdo Xasan.

Xasan wuxuu aad ugu fiicnaa farshaxanka, gaar ahaan taswiirta, hase ahaatee, wuxuu taswiiro isaga oo aan dhammayn buu jeexjeexaa. Macallinkii wuxuu arkay in Xasan talo uga baahan yahay, loona baahan yahay in ay noqoto talo canaan ka reebban. Macallinkii wuxuu bilaabay inuu markuu miiska Xasan dul-tago erayo ku tuuro. Hadallada macallinka waxaa ka mid ahaa:

1. Xasan markuu wax taswiirayo waxaad mooddaa in la eryanayo.
2. Inaad taswiir nool sameyso Xasan, ma dhib yara.
3. Aqal Soomaaligaa sidaad u taswiirtay waan jeclaaday ee dhammaystir.
4. Rinjigaasi waa midabkaan jecelahay.

Xasan weedhahaa macallinka mid ka mid ah markuu maqlaba, wajigiisa farxad baa fuusha. Ardaydii fasalka la dhiganaysay baa markiiba xiisaysay Xasn waxqabadkiisa. Xasanna wuxuu billaabay dadaal uu ugu jiro inuu muujiyo kartidiisa iyo waxqabadkiisa.

Sheekadan waxaan ka fahmaynaa sida dhibta yar ee macallinku u soo saaray kartida Xasan, isaga oo aan toos u abbaarin, inuu degdegana u sheegin.

## DHIIRRIGELINTA WAX AKHRISKA

Haddii arday la yimaaddo dhibaato xad-dhaaf ah, ardaygaa waxaa haysta dhibaato ku kalliftay inuu arrimaha qaarkood ku dhaqaaqo. Mustafa arday la yidhaahdo oo siddeed jir ah aan tusaal u soo qaadanno.

Mustafa laba sannadood baa lagu hayay fasalka labaad, kaddib markuu yax akhriska baran waayey. Intaa kaddib buu Mustafaa ku kacay arrimo qallafsan oo ay ka mid yihiin :

1. Inuu wax ku feegaaro gidaarka iyo shimiintada.
2. Inuu fasalka dhex or-ordo oo rabsheeyo.
3. Inuu carruurta laayo.
4. Inuu fasalka oo macallinkii ku jiro ka cararo.

Macallinkii markuu u adkaysan waayey buu fasal kale u beddelay. Macallimaddii cusbayd ee loo geeyey dhaqan cusub bay Mustafa kula dhaqantay. Mustafa markuu wax akhriyayo si fiican bay u dhegeysataa. Markay wax u sheegayso khaladkiisa ma tilmaantee erayo tusaale ah bay maqashiisaa, waxay tidhaahdaa :

1. Sheekadaad akhriday waan jeclaystay;
2. Ereyadii adkaa si fiican baad ugu dhawaaqday;
3. Sheekadaad akhriyaysay waa fiican tahaye dhamee.

Mustafa beryo kaddib wax akhriskiisii horumar buu sameeyey, waxaa kaloo isbeddelay dabeecaddiisii oo asluub suubban buu la soo baxay.

Sheekadan waxaan ka arkaynaa in macallimaddu isticmaashay tab iyo xeel beddeshay Mustafa, ayna ka badbaadisay inuu dugsiga oo dhan ka cararo oo waxbarashada joojiyo.

## SAXIDDA ARDAYDA

Badanaaba macallimiintu markay saxayaan buugaagta ardayda waxay ku qoraan tiro tilmaamaysa inta ardaygu gartay. Macallimiinta qaarkeed waxay isticmaalaan erayo si ay u dhiirrigeliyaan ardayda.

Haddaan tusaale u soo qaadanno weedho ay isticmaashay oo buugta ardayda ku qortay macallimad fasalka 8aad xisaab u dhigtaa waxay ahaayeen kuwa soo socda :

1. Xasan, far nadiif ah baad ku shaqeysay.
2. Maryan, erayo wada sax ah baad qortay.
3. Maxamed, jawaabahaaga oo dhammi waa sax.
4. Safiya, xisaabta waad fahamtay.

Macallimaddani waxay ardayda ku dhiirrigelisay inay tacliinta jeclaadaan. Ardaydii markiiba horumar bay muujiyeen. Waxay billaabeen in ay iyana buugga hareerihiisa macallimadda wax ugu qoraan, iyaga oo leh:

1. Xisaabtani waa fiican tahay.
2. Shaqadii xisaabtu waa igu adkaatay, hase yeeshee, waa soo dadaalay.
3. Inaan si nadiif ah uga soo shaqeeyo baan ku soo dadaalay, iyo wax la mid ah.

## ISKU DAY, WAA DHIB YARE!

Ka adkaanta niyadda ardayga iyo ku dhiirrigelinta waxbarashada ma aha arrin sahlan. Waxaa fiican oo habboon in mcallinku ka taxadaro eray kasta oo afkiisa ka soo baxaya markuu darsiga dhigaayo. Waxaa jira erayo iyo weedho badan oo macallinku uga jeedo in ardaygu tacliinta ku dhiirrado oo wax qabto, hase yeeshee, marka ardayga tacliinta ku liitaa maqlo si gaar ah u fasisho.

Marka arday maaddo ku liita macallinkii dhigaayey ku yidhaahdo «Isku day waa dhib yar tahaye» ama uu yidhaahdo, «aad bay u jilicsan tahaye ka shaqee!» ardaygiina wixii ku yihiin buur-qaaf, wuxuu ku dadaalayaa inuu ceebta ka fakado. Wuxuu ardaygu niyadda ka odha-

nayaa, «xitaa haddaan isku dayo oo aan garan waayo, waxaa caddaanaysa, waxa jilicsan xataa inaanan garanayn. Waxaa caddaanaysa in aan ahay damiin waxa dhibta yar xataa aan fahmayn. Marka isku daygaygu ceeb uun buu sidaa ee waa inaanan far saarin».

Ardayga noocaas ah, wuxuu abuuraa dhibaato marka wax laga dhaadhicinaayo, ama wax loo dhigaayo, wuxuuna isku qariyaa qiiq, taasoo ah isaga oo is-daafac ku jira. Arrinkan waxaa inoo sii qeexaya sheekada soo socota oo dhexmartay Ibraahim oo fasalka shanaad dhigta iyo macallinkiisii xisaabta.

Ibraahim wuxuu yidhi: «Macallin waxaan filayaa in aanan xisaabta ku wanaagsanayn!».

Macallnkii baa ku jawaabay, «wanaag iyo wanaag la'aani meesha ma taal. Xisaabtan anigaa si fiican kaaga dhaadhicinaya. Aad bay u dhib yar tahay. Si wanaagsan haddaad ii dhegeysato, waad fahmaysaa. Waan ogahay oo arday fahmo wanaagsan baad tahay».

Ibraahim macallinka hadalkiisii ma dhegeysane, wuxuu ku hawllanaa khiyaamaduu ku fakan lahaa. Buuggii buu ogaan dhulka ugu tuuray. Sidii wax buugga soo qaadaya intuu iska dhigay buu kursiguu ku fadhiyey dabada u rogay oo isagii iyo kursigiiba iska daba dhaceen.

Macallinkii oo sida wax u dhacayaan ka xun baa ku canaantay, «Ibraahim maxaa kugu dhacay? Wax dhegeysan mayside, waa sidee? Niyaddaada casharka u soo jeedi».

Ibraahim baa caddaystay oo ku jawaabay, «Xisaabtani aad bay u adag tahay, macallin».

Macallinkii wuxuu ku ceshay, «ma adka! Xisaab adag ma aha! Hase ahaatee, haddaad wax kale ka fekerayso oo aanad i dhegeysanayn waxba kuma fahamsiin karayo».

Ibraahim baa isku daafacay, «wax kale kama fekerayee xisaabtan baanan fahmayn».

Macallinkii baa yidhi, «Waxbaanad dhegeysanayn ee xisaabtu aad bay u jilicsan tahay».

Sheekadan waxaan ka fahmaynaa in dhibaatada macallinka iyo ardayga dhex taal ay tahay mid ka dhalatay hadallada macallinka isaga oo is-leh waxtar, hase yeeshee, wuxuu dhigaayey yasay oo hoos u dhigay oo ka dhigay wax jilicsan. Ardaygiina markuu garan waayey dhufays galay oo ka baxsaday ceebta ka dhalanaysa wax jilicsan garan-la'aanta.

Macallinku markuu Ibraahim sida uu u soo taagan yahay arko, hadduu ku odhan lahaa, «fahamka xisaabtu wax dhib yar ma aha. Anigaba dhibaato badan baan ka soo maray. Haddaadse si fiican ii dhegeysato waxaa laga yaabaa inaan ku guuleysanno»: hadalkaasi waxaa laga yaabaa inuu dhibaatada yareyn lahaa.

Midda kale, haddii ardaygu fahmi waayo macallinku wuxuu sharxayo, ma aha in macallinku yidhaahdo ardayga fahmadiisa baa xun ee waa inuu eedda saaraa habka uu wax ku dhaadhicinayey oo mar kale qaadaa waddo kale oo mar labaad isku dayaa inuu ardaygii qanciyo ama wax fahamsiiyo.

## IS—MAAMUL

Waxaa fiican, marka la doonayo in ardayga tacliinta lagu soo jeediyo inaan la khasbin. Waxaa kale oo fiican in loo oggolaado xorriyad iyo inuu maamulo wax akhriskiisa oo isaga la weydiinayo sida uu wax u akhrisanayo. Waalidka iyo macallinkuba waa inay ixtiraamaan dareenka iyo rabidda ardayga.

Bal aan eegno sheekada soo socota oo dhexmartay. Xaawo oo fasalka 4aad dhigata iyo macallinka Sayniska.

Xaawo : Macallin hooyo iyo aabbe Baydhaba bay tageen, oo bil bay maqnaanayaan, imminka wixii ka dambeeyana waxaad ii dirto waa ka soo shaqaynayaa.

Macallinkii: Ma waalidkaa markuu tegay baad shaqo iyo wax akhris bilaabaysaa?

Xaawa : Haa, waxay i yidhaahdaan qabo waa nebcahay, markaan is-idhaahdo wax akhrisaba waxaan maqlaa hooyaday oo i leh. «Naa Xaawo, miyaanad wax akhrisanayn? Buugga miyaanad fureynba?» Marka waxay ila noqotay in lay khasbaayo, waxaan qabtayna waxay ila noqdaan inaan hooyo awgeed u qabtay ee ayan ahayn mid ka timid rabiddeyda.

Macallinkii: Ma waxaad jeceshahay inaad adigu is-dirto?

Xaawo : Haa! Sidaas baa fiican;

Macallinkii: Ma waxaad jeceshahay in aad adigu shaqadaada ogaato oo go'aankeeda yeelato?

Xaawo : Haa! Sidaas baa fiican macallin, adba waad arki sida aan imminka wax u soo akhristo.

## KA XOROWGA BAQDINTA

Dugsiyada markii la furay, baa macallin si uu u yareeyo baqdinta ardayda, waxbarashadana u dhiirrigeliyo, ardaydiisii oo dhan warqado u qaybiyey. Warqadaha macallinku qaybiyey waxaa ku qornaa arrimaha soo socda :

«Ardaydaydiiyey, dhibaata i haysata awgeed, waxaan u baahanahay in aan gacan idinka helo. Waxaan jeclahay in aan ardayda ku dhiirrigeliyo inay su'aalaha ka jawaabaan. Waxaanse ogaaday in ardayda qaarkeed baqanayso. Waxay ka baqanayaan in la foorjeeyo. Wa-

xaan idinka baryayaa inaydaan arday khaldamay ku qoslin ama foorjeyn. Ereyada iyo eegmada macnaheedu yahay «damiin baad tahay», fasalkeenna waa ka reebban yihiin. Waxay waxyeelayaan dareenka ardayga, waxayna is-hortaagayaan waxbarashada. Markaad aragtiin arday khaldamay ama su'aal ka jawaabi kari waayey idinkoon waxba isaga u geysan waxaad tidhaahdaan, «jawaab kale baan hayaa».

Inkasta oo macallinkaasi warqadahaa ugu talo galay ardayda, haddana ardaydu waxay gaynayaan guryahoodii oo waalidkii baa akhrisanaya oo fahmaya dadaalka macallinka, gacanna ku siinaya, si uu u gaadho himiladiisa. Ardaygii gees mara codsigaas macallinka, wuxuu helayaa nuqulkii warqaddii hore, si uu u xasuusto codsigii macallinka uguna dhaqmo.

* * *

Si ay u yareeyaan baqdinta ardayda baa dugsi macallimiintii iyo maamulihii shireen, waxayna ku heshiiyeen inay xeer ka dhigtaan in intaan imtixaanka la gaadhin ay ardayda ka qaadaan imtixaanno badan.

Ardaydii aad bay uga heleen ama u jeclaadeen, iyaga oo ogaaday in baqdintoodii yaraanayso ogaanayana meesha imtixaanku ka imaanayo oo aad u akhrisanaya. Taasina waxay suurogelinaysaa inay wax badan bartaan oo xasuustaan.

## QIIMEYNTA TAXANAHA AFKAARTA

Taxanaha afkaarta ardayga in baruhu qiimeeyaa waa dhiirrigelinta waxbarashada.

Arday 7 jir ah oo fasalka labaad dhigta baa sabuuradda wuxuu ku dhigay:

8 — 4 = 8

7 — 3 = 7

6 — 2 = 6

Macallinkii oo haba yaraatee aan la yaab muujin baa ardaygii ku yidhi, «waxaad ii sheegtaa sida aad jawaabahaaga ku heshay. Waxaan jeclahay inaad qunyar iga dhaadhiciso sida aad wax u kala jarto».

Ardaygii oo weli kalsooni ka muuqato baa macallinkii ka dhaadhiciyey sida uu xisaabta uga shaqeeyey isaga oo leh :

Siddeed marka afar laga qaado waa siddeed 8—4=8
Toddoba marka saddex laga qaado waa toddoba 7—3=7
Lix marka laba laga qaado waa lix 6—2=6.

Macallinkii markiiba wuxuu gartay sida ardaygu wax u fahmay inay tahay 8 iyo 4 is-dul saaran in la kala qaadayo oo marka 4,8 laga dul qaado ay soo harayso 8. Waxaa macallinka hawshiisii fududeysay tixgelinta uu siiyey taxanaha afkaarta ardayga, waxaana u fududaatay in uu si dhib yar ardayga khaladkiisa u tuso iyo inuu u gudbo casharkii ku xigay isaga oon dhibaato la kulmin.

## EREYADA NIYAD-JABINTA

Waalidka iyo macallimiintuba mararka qaarkood, waxay waxyeelleeyaan niyadda ardayga, waxayna hoos u dhigaan waxqabadkiisa ama waxbarashadiisa. Waxay ardayga ku yidhaahdaan erayo qiimo dhac ama qiime-jab ah. Waxaa weedhaha ardayga waxyeelleynaya ka mid ah, «Inaan maskaxdaadu fiicnayn waan ognahay oo wax weyn kaa fili mayno. Waxaad yeeli inta itaalkaaga ah wax akhriso. Haddii aad imtixaanka gudubto nagu filane».

Erayadaasi ardayga waxay ka fogaynayaan dadaalka. Xataa hadduu dadaalo wuxuu fishaa waa gudbid imtixaan. Haddii uu dhacana wuxuu u qaadanayaa mid xataa heerkii ugu hooseeyey gaadhi waayay oo aan waxba ku wanaagsanayn.

Erayada ardayga dhiirrigelinaya ee macallinka iyo waalidka laga filaa waxaa ka mid ah: «Waxaan kaaga fadhinnaa inaad waxbarato. Waxbarashadu ma aha bakhtiyaa nasiib ee waa in lagaa helaa dadaal iyo niyad».

## GABAGABO

Markaan soo duuduubno arrimihii aynu soo aragnay oo dhan salkoodu wuxuu ahaa dhaqdhaqaaqa waxbarashada iyo dhiirrigelinta arday waxbarashada ku liita iyo kicinta dareenkiisa. Waxaynnu soo aragnay in jawaabta macallinku siiyo ardayga ay tahay midda hoggaaminaysa waxbarashadiisa. Waxaynu aragnay oo kale in arrimaha kala geddisan ee ardaygu u jeedinaayo macallinka, macallinku inuu fiiro iyo taxaddar gaar ah siiyo, kana taxaddaro isbeddelka ay la imanayso ilbaxnimada maalinba maalinta ka dambeysa soo kordhaysa.

Dugsiyada macallimiinta iyo maamulka oo wadajiraa, ay ku abuuri waayaan jawi waxbarasho waxaa ka dhasha arrimo ardayda ku beeraya:

1) Inayan iskaashi muujin.

2) Inayan macallinka gacan siin.

3) Inayan wax akhrisan.

4) Inayan wax adeecin.

Taasina bulshada iyo ardaygaba waxay u tahay halaag aan dawo lahayn. Dugsiyada noocaas ahi inta maamulka iyo macallimiintu jawi waxbarasho ka abuurayaan lama daweyn karo.

Markaan kicinta dareenka ardayga waxbarashada ku liita iyo u soo jeedinta niyaddiisa tacliinta, tusaale gaaban aan ku soo koobno waxay noqonaysaa sheekadan soo socota :

Waxaa la yidhi, beri baa aqal gubtay. Ciidammadii dam-damiska baa goobtii yimid si ay dadka ku jira u bad-baadiyaan. Waxay u tageen nin hurda oo khuurinaya. Waxay isku dayeen inay qaadaan oo badbaadiyaan, waase u suurtoobi weyday. Iyaga oo la liita oo waxay sameeyaan garan la' baa waxaa u yimid ninkii kooxda dab-damiska xukumayey. Waxay ku yiraahdeen, «ninkani waa hurdaa mana badbaadin karno ee maxaan yeeleynaa».

Wuxuu ugu jawaabay, «Hurdada ka kiciya isagaa is-badbaadinaye».

Sheekadan murtida ay siddaa waa caddaan. Ardayga hurda ee aan tacliinta u soo jeedini, macallin kasta oo niyad fiican la yimaada wax kama taro. Waxaa loo baahan yahay in ardayga la kiciyo, kartidiisa la soo saaro, kaddib isagaa is-badbaadinayee.

## BUUGTA LA ADEEGSADAY


1) Ginott, Haimg, **Teacher & Child,**
New York, The Macmillan Company, 1972.

2) Hilliard, F.H, **Teaching the Teachers,**
London, George Allen & Unwin LTD 1971.

3) Wheeler, Dame Olive & Others, **Mental Health and Education,** London, University of London Press LTD, 1961.

4) Morris, Van Cleve & Others, **Becoming An Educator,**
Boston, Houghton Mifflin Company, 1963.

5) Willgoose, Carl E., Ed.D., **Health Education in the** Elementary School, Philadelphia, W.B. Sounders Company, 1969.

6) Lovell, K. B.sc., M.A, Ph., **Educational Psychology and Children,** London, University of London, University of London Press LTD, 1965.